FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · WASAARADDA MAALIYADDA · MINISTRY OF FINANCE · OFFICE OF THE STATE MINISTER · XAFIISKA WASIIRU DOWLAHA · JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA

**H.E Raho Mohamud Janaqow**
**Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda**
**Ahna K/s Wasiirka Maaliyadda**

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA**
**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA**

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب محامى العام للدولة

**THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA**
**OFFICE OF STATE ATTORNEY GENERAL**

**SUMMAD: XGG/187/2024** **25/06/2024**

**Ku: Wasaaradda Maaliyadda** **Muqdisho**
**Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Gudbin Xeer-nidaamiye**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tixraacaya Warqadda **Ref: WOF/OM/0496/2024,** ee ku taariikheysan **June 20, 2024**, Ujeeddadeeduna ahayd: **Soo Gudbinta Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo soo saarista Dammaanadaha,** kana soo baxday Xafiiska Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda XFS.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Xeer Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976, ayaa waxa uu halkaan idinkugu soo gudbinayaa **"Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha, Hannaanka Ammaahashda iyo soo saarista Dammaanadaha"** oo ay Wasaaraddu horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa Shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda markuu darsay Xeer-nidaamiyahan oo ah mid mudnaan gaar ah u leh Xayndaabka Siyaasadda Deymaha, Hannaanka Ammaahashada iyo soo saarista Dammaanadaha, waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirrada si ay u meel-mariyaan, maadaama uu waafaqsan yahay Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud oo islamaarkaana awood u siinaya Wasaaardda samaynyta Xeer-Nidaamiye sida ku xusan Qodobka 62 ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Sharci Lr. 17 ee soo baxay 25/12/2019.

Ugu dambeen, Xafiiska Garyaqaanka Guud waxa uu ku wargelinayaa Agaasimaha Golaha Wasiirrada iyo Wasaaradda Maaliyadda in Nuqulka ku lifaaqan warqaddan uu yahay nuqulka loo gudbinayo Golaha Wasiirada si ay u meel-mariyaan, maadaama Xafiiska Garyaqaanka Guud uu ku samayey saxitaan iyo toosin nuqulkii Wasaaraddu u soo gudbisay.

**FG**: Halkaan waxaa ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha Sare ku xusan.

Salaan qadarin leh

**Qareen: Jibriil Cumar Cilmi**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA * OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL * مكتب المحامي العام للدولة

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

**Ref: MOF/OM/0495/2024** **June 20, 2024**

Ku: Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Maaliyadda

**Ujeeddo: Soo gudbinta Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud, ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo soo saarista Dammaanaddaha**

Waxaan halkan ku soo gudbinaynaa Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud, ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo soo saarista Dammaanaddaha. Xeer-nidaamiyaha ayaa loogu talagalay si loo sii adkeeyo nidaamka deymaha iyo hanaanka amaahashada iyo soo saarista dammaanaddaha ee dalka u yaala.

Wasaaradda Maaliyadda oo fursadan ka faa'iidaysanaysa ayaa uga mahadcelinaysa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda wada shaqaynta dhow ee ay la leedahay.

**Wada Shaqan Wacan**,

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE MINISTER
XAFIISKA WASIIRKA
MINISTRY OF FINANCE
WASAARADA MAALIYADDA

**Xil. Biixi Iimaan Cige**
**Wasiirka Wasaraadda Maaliyadda**

Dr. Jibril
22/06/2024

XAFIISKA GARYAQAANKA
GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 22/06/2024

***JAMHUURIYADDA FEDERAALAALKA SOOMAALIYA***

**Xeernidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha, Hannaanka Amaahashada iyo soo saarista Dammaanadaha.**

## Qodobka 1aad
## Cinwaanka iyo Ujeeddooyinka

1. Xeerkanidaamiyahan waxa loo aqoonsan doonaa: "Xeernidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka siyaasadda deymaha iyo hannaanka ammaahashada iyo dammanadaha."

2. Xeerkan ujeedkiisu waa in la dejiyo hagayaal dhammaystiran oo keenaya in deynta dadweynaha loo maareeyo si waafaqsan shuruucda dalka, iyada oo la qeexayo xayndaabka siyaasadeed, is la markaana la tilmaamayo habraacyada loo maraayo ammaahashada iyo dammaanadaha.

## Qodabka 2aad
## Xayndaabka Seeraha Siyaasadda Deymaha

1. Ujeedooyinka Jamhuuriadda Federaalka Soomaaliya ee Siyaasadda Deyntu waa:
    a) In si wakhtiyaysan loo hubiyo daboolista baahida maaliyadeed ee dawladda, haddii ay noqoto wakhtiga dhow iyo kan dheerba.

    b) In la yareeyo kharashka ku baxa ammaah qaadashada, goor kastana laga durko halisaha aan xikmadda ku fadhiyin.

c) Marka duruufta guud ee dhaqaale ay saamaxdo, in la xoojiyo horumarinta suuqyada dhaqaale ee gudaha.

2. Qeybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, waa in ay diyaarisaa oo si joogto ahna u cusboonaysiisaa Istiraatiijiyadda Maareynta Deymaha ee Muddada Dhexe (Medium-Term Debt Management Strategy) iyada oo sanadkiiba hal mar dib u qaabayn lagu samaynaayo; Golaha Wasiiraduna waa in ay darsaan oo ansixiyaan istiraatijiyaddaas iyo dib-u-eegisteeda sanadlaha ah.

3. Qeybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, iyada oo si dhow ula tashanaysa Waaxda Qorsheynta & Siyaasadda Dhaqaalaha ee Wasaaradda, waa in ay si sanadle ah, (iyo goor kasta oo loo baahdoba) u samaysaa Falanqaynta Joogteynta Deymaha (DSA), si loo qiimeeyo awoodda ay Soomaaliya u leedahay ka soo bixista waajibaadkeeda dhinaca deymaha.

## Qodobka 3aad:
## Habraaca Ammaah-qaadashada

1. Erey-bixinta: "Heerka/xadka u sarreeya ee ammaah-qaadashada Sanadkii Gudaha iyo Dibeddaba", sida ku qeexan Qodobka 35(1) ee Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud, 2019, waxaa lagu qeexay Xeernidaamiyahan, iyada oo macnaheedu yahay baahida ammaahashada sannadlaha ah ee Qaranka, ammaahdaas oo u taagan is dhinka maaliyadeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sidaas darted, hadda wixii ka dambeeya, qorshayaasha lagu daboolaayo is-dhinka ku yimaada miisaaniyadda dawladda waxa lagu tilmaami doonaa Qorshaha Ammaahda Sannadlaha ah ee Qaranka.

2. Wasiirka Maaliyaddu, 30-ka Oktoobar ee sannad kasta, waxa uu labada Aqal ee Baarlammaanka Federaalka Soomaaliya hor geyn doonaa Miisaaniyadda Qaranka ee ay ansixiyeen Golaha Wasiiradu, iyada oo ay miisaaniyadda la socoto soo jeedinta Qorshaha ammaahashada sannadlaha ah ee Qaranka, iyo sidoo kale shuruudaha iyo waajibaadka guud ee hagaya amaahaha noocaas ah. Ilaha Qorshaha amaahashada Sannadlaha ah ee la soo jeediyay waa in ay noqdaan kuwo ku saleysan Istiraatiijiyada la ansixiyay ee Maareynta Deynta ee Muddada-Dhexe.

3. Soo jeedinta Qorshaha amaahashada sannadlaha ah ee Qaranka iyo sidoo kale shuruudaha iyo waajibaadka guud ee maamulaya amaahdaas ee uu soo bandhigay Wasiirka Maaliyaddu, waxa ay dhaqan-gelayaan uun marka uu Baarlammaanka Federaalku ansixiyo, kuna soo saaro ‘Xeerka Miisaaniyadda’.

4. Iyadoo la raacayo faqradaha kor ku xusan ee Xeernidaamiyahan, Wasiirka Maaliyaddu, isaga oo ah amaahdaha keliya ee qaran, waxaa awood u gaar ah loo siiyay in uu ku dhaqaaqi karo hawlo uu ‘ammaah’ ku soo qaadayo, waddanka gudahiisa iyo dibeddiisa kii ay noqotoba, isaga oo ka wakiil ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sidaas oo ay tahay, Wasiirka Maaliyaddu waa inuu ku shaqeeyaa Qorshaha amaahashada sannadlaha ah ee uu dejiyay Baarlammaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sidoo kale waa inuu si adag u raacaa shuruudaha iyo waajibaadka guud ee lagu maamulayo amaahdaas ee lagu ansixiyay Xeerka Qoondada Miisaaniyadda.

5. Dhammaan heshiisyada cusub ee ammaahda gudaha iyo dibedda kii ay tahayba ee uu soo galay Wasiirka Maaliyaddu, haddii ay yihiin kuwo waafaqsan Qorshaha Amaahashada Sannadlaha ah ee la ansaxiyey; iyo shuruudaha iyo wajibaadka guud ee ammaahda ee uu baarlammaanka Federaalku ku dejiyay Xeerka Miisaniyadda, waxa ay noqonayaan kuwo ay tahay sharci ahaan in loo hoggaansamo. Heshiisyada noocaan ahi waxa ay dhaqan-gal ku noqonayaan si waafaqsan shuruudahooda iyada oo aan loo baahan tallaabooyin kale oo sharci ama maamul oo lagu ansixinaayo.

6. Wasiirka Maaliyadda waxa uu u gudbinayaa heshiisyada ammaahda cusub ee gudaha iyo dibedda ee uu galay Garyaqaanka Guud ee Dawladda si uu u qiimeeyo, waxaanu ka eegayaa in heshiisyadaasi ay waafaqsanyihiin Qorshaha ammaahashada sannadlaha ee Qaran, guud ahaan shuruudaha iyo waajibaadka uu Baarlammaanka Federaalku ku dejiyay Xeerka Qoondada Miisaaniyadda. Marka ay soo dhammaato qiimayntaasi, Garyaqaanka Guud ee Dawladdu waxa uu soo saarayaa talo sharci oo muujinaysa in dawladdu raacday Qorshaha amaahashada sannadlaha ee la ansixiyey iyo guud ahaan shuruudaha iyo wajibaadka uu Baarlammaanka Federaalku ku meel mariyay Xeerka Miisaaniyadda.

7. Wakhti munasib ah ka hor inta aan ammaah cusub la qaadan, Qeybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay samaynaysaa qiimayn dhammeystiran oo ay ku eegayso ‘ammaahdaasi’

saammaynta ay ku yeelan karto xasiloonida dhaqaalaha guud ee wadanka gudahiisa iyo xammilka culayska daynta sida suurtagalnimada joogteynta bixinta deynta. Marka la sameenayo qiimaynta noocaan oo kale ah waa in xisaabta lagu darsado ballan-qaadyada maaliyadeed ee muddada-dheer oo ay soo saartay ama ay oggolaatay Wasaaradda Maaliyadda.

8. Mar kasta oo la galo heshiis ammaah ah oo lagu soo qaado magaca Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, iyadoo lagu shaqeeynayo Qorshaha amamahashada ee la dejiyay, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu si deg-deg ah xogta amaahdaas ula wadaago Baarlammaanka Fadaraalka ah; muddo laba todobaad ah gudahood, oo ka billaabanta goorta la dhammeystiray heshiiska ammaahda, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu nuqullada heshiis kasta oo ammaaheed oo la galay u gudbiyaa Baarlammaanka Federaalka.

9. Hantidhowraha Guud waa inuu diiwaan-geliyaa dhammaan heshiisyada deymaha ee la galay, iyada oo uu u eegaayo qodobada xeerkan ee khuseeya. Muddo laba toddobaad ah gudahood marka la galo heshiiska ammaahda, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu nuqul ka mid ah heshiisyada ammaahda u gudbiyaa Xafiiska Hantidhowraha Guud ee Qaranka si uu u diiwaangeliyo.

10. Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobada kor ku xusan ee Xeernidaamiyahan, Qorshaha sannadlaha ah ee Ammaahda Qaranka ee la ansixiyay oo ay weheliso shuruudaha iyo waajibaadka guud ee lagu maamulayo deymaha uu Baarlammaanka Federaalku ku dejiyey Xeerka Miisaaniyadda ayaa noqonaya Qorshaha ammaahashada sannadlaha ah ee Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya.

11. Lama qaadan karo wax ammah ah gudaha iyo dibedda kii ay noqotoba, ilaa hannaanka ammaahdu ka waafaqayo qodobada Xeernidaamiyahan.

# Qodobka 4aad
# Ballan-qaadyada kale ee Maaliyadeed ee muddada-dheer

1. Wasiirka Maaliyaddu waxa uu leeyahay awoodda aqoonsiga iyo caddaynta noocyada ballanqaad maaliyadeed kale ee muddadoodu dheertahay iyo weliba jaangoynta shuruudaha iyo waajibaadka guud ee "ballanqaadyadaas" lagu maamulaayo. Dhammaanba noocyada ballanqaadyada maaliyadeed ee muddada dheer ee la caddeeyay iyo shuruudaha guud ee lagu maamulaayo waa in loo gudbiyo Baarlamaanka Federaalka oo ay ansixiyaan, kuna soo saaraan Xeerka Miisaaniyadda ee sanadlaha ah.

2. Ka dib ansixinta Baarlamaanka Federaalka ah, Wasiirka Maaliyadda, isaga oo matalaaya Dawladda Fadaraalka ah, waxaa la siiyay awood gaar u ah oo uu ku soo saaro, kuna oggolaado ballanqaadyada maaliyadeed ee muddada dheer, ballanqaadyadaas oo ka mid ah kuwii shuruudahooda guud la ansixiyay. Sidaas oo ay tahay, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu ku shaqeeyo shuruudaha iyo waajibaadka guud ee loo dejiyay maamulista noocyada ballanqaad maaliyadeed ah ee muddada dheer ee uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyay kuna soo saaray Xeerka Miisaaniyadda.

3. Dhammaanba ballanqaadyada maaliyadeed ee muddada dheer ee uu Wasiirka Maaliyaddu ku soo saaro ama ku oggolaado magaca Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya, haddii ay u hoggaansamaan shuruudaha iyo waajibaadka guud ee lagu maamulo ballanqadyada noocaas ah ee uu Baarlamaanka Fadaraalku ku soo saaray Xeerka Miisaaniyadda, waxa ay noqonayaan kuwo sharci ahaan meel-mar ah. Heshiisyada xambaarsan ballanqaadyada maaliyadeed ee muddadoodu dheertahay, waa in ay u dhaqan-galaan si waafaqsan shuruudahooda, mana loo baahna qaaditaanka wax tallaabooyin dheeraad ah oo sharci ama maamul oo heshiisyadaas lagu ansixinaayo.

4. Ka hor inta aan la fulin ballanqaadyada maaliyadeed ee muddadoodu dheertahay ee cusub, Qaybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, muddo macquul ah gudaheed waa in ay ballanqaad kasta ku mariyaan qiimeeyn dhammaystiran oo lagu ogaanaayo qiimaha ay ku kacayso iyo khatarta la socota, si loo falanqeeyo loona garto saameynta uu "balanqaadkaasi" ku yeelan karo xammilka dalka ee waajibaadka deymaha iyo xasiloonida dhaqaalaha guud ee Dalka.

5. Heshiis kasta oo xambaarsan ballanqaad maaliyadeed oo wakhtigiisu fogyahay oo lagu galo magaca Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu Baarlamaanka Federaalka ah ogaysiiyo jiritaankiisa. Ka dib marka uu heshiiskaasi dhaqangal noqdo, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu muddo laba todobaad ah gudahood qoraalada heshiisyada noocaas ah Baarlamaanka Federaalka ah ugu geeyo.

6. Muddo laba todobaad ah gudahood, oo ka bilaabanta wakhtiga dhaqangalka heshiis kasta oo xambaarsan ballanqaad maaliyadeed oo mudadiisu dheertahay, Hanti-dhowrka guud waa in uu diiwaan-geliyaa dhammaan nuqullada heshiisyadaas ee lagu soo galay magaca Jamhuuriyadda Federaalka ah Laba toddobaad gudahood marka la fuliyo heshiisyadan, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu Hantidhawrka Guud u gudbiyo nuqul ka mid ah heshiisyadas si loo diiwaan-geliyo.

## Qodobka 5aad
## Habraaca loo maraayo Isticmaalka Xuquuqda soo Qaadashada Gaarka ah (Special Drawing Rights - SDR).

1. Xuquuqda soo qaadashada gaarka ah (XSQG) waa hab gaar ah ee khuseeya keydka hanti lacageed oo caalami ah oo uu sameeyay Sanduuqa Lacagta Aduunka (IMF), si ay kab ugu sameeyaan keyda rasmiga ah ay leeyihiin waddamada xubnaha ka ah Sanduuqa Lacagta Aduunka. Qoondada xuquuqda soo qaadashada (SDR) ma aha deyn uu bixiyo Sanduuqa Lacagta Aduunka (IMF). Sidaas oo ay tahay, wadamada xubnaha ka ah Sanduuqa Lacagta Aduunku, waxaa laga doonayaa in ay bixiyaan lacag dulsaar ah hadii ay dhacdo in waddan uu ka hoos maro qoondadii uu lahaa, isaga oo waddankaasi dulsaar ahaan u bixinaayo hadba farqiga u dhexeeya qoondada asalka ah iyo dhigaalka uu markaas haysto. Heerka dulsaarkuna waxa uu ku jaan-go’anyahay hadba sicirka dulsaarka ee markaas taagan SDRs-ka.

2. Sidoo kale, Sanduuqa Lacagta Aduunku waxa ay leeyihiin barnaamij ay deyn ku siiyaan wadamada xubnaha ka ah, si ay u daboolaan baahiyo markaas taagan iyo duruufo u gaar ah wadankaas, amaahintaas waxaa la socota dulsaaro kala duwan. Dhammaan deymaha uu Sanduuqa Lacagta Dunidu bixiyo qiimo ahaan waxa ay ku salaysanyihiin ama ku jaan-

go’anyihiin hannaankaas Xuquuqda Soo Qaadashada Gaarka ah - Special Drawing Rights (SDR)/XSQG.

3. Iyadoo la eegayo dabeecadda gaarka ah ee Sanduuqa Lacagta Aduunku uu ku bixiyo deymaha iyo qoondada Xuquuqda soo Qaadashada Gaarka ah (XSQG) looma raacaayo habraacyada amaahashada ee ku qeexan Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud, 2019, amaba Qodobka 3aad ee Xeernidaamiyahan; mana saameynayso wixii macaamilo ah ee ku saabsan Xuquuqda soo Qaadashada Gaarka ah (XSQG) ee ka dhaxaysa Sanduuqa Lacagta Aduunka iyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomalaiya gaar ahaan iyadoo loo marayo “Bangiga Dhexe ee Soomaaliya” oo ah hay’adda u qaybsan Arimaha Malaiyadda (Fiscal Agent). Taa beddelkeeda, qaadashada deymaha Sanduuqa Lacagta Aduunka, helitaantanka iyo ka faa'iidaysiga Qoondada “SDR” waxaa lagu maamuli doonaa heshiiska u dhexeeya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Sanduuqa Lacagta Aduunka (IMF), Kaasoo ay ku jiraan u hoggaansanaanta ujeeddooyinka isticmaalka la cayimay, shuruudaha warbixinta, ujeeddooyinka isticmaalka ee cayiman, u hogganaansanaanta tilmaamaha iyo hababka caalamiga ah ee lacagta, iydoo la eegayo nooca Xuquuqda soo qaadashada Gaarka ah (SDR).

## Qodobka 6aad:
## Habraaca lagu maamulayo Bixinta Dammaanadaha Ammaahda.

1. "Dammaanadda Deynta”, waxaa loo la jeedaa ballanqaadka uu sameeyo dammaanad-qaadaha deyntu. Caadi ahaan halkan oo kale, waa dammaanadda ay bixiso Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo uu matalaayo Wasiirka Maaliyaddu, si loo fuliyo waajibaadka dib-u-bixinta deynta ee ammaahdaha, iyada oo loo eegaayo shuruudaha amaahda haddii ay dhacdo in amaahduhu uu bixin waayo deynta. Sidoo kale, waxa tixgelin la siinayaa hadiiba uu jiray heshiis dammaanad-qaad labaad oo ka sii dambeeya ama taageeraaya dammaanadda dawladdu bixisay markii deyntaas la qaadaayay (Counter-guarantee), taas oo ay tahay in la oofiyo wixii waajibaad ah ee ka dhashay qodobada dammaanaddaas labaad.

2. 30ka bisha Oktoobar ee sannad kasta, Wasiirka Maaliyaddu marka uu miisaaniyadda qaran ee Golaha Wasiiradu ay ansixiyaan, waxa uu u

geynayaa labada Aqal ee Baarlammaanka Federaalka Soomaaliya, sidoo kale waa in uu keenaa soo jeedin muujinaysa xadka dammaanadaha ee deymaha sanadkii lagu bixin karo magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo sidoo kale shuruudaha iyo waajibaadka guud ee xukumaya dammaanad qaadyada ammaahda.

3. Soo jeedinta sanadlaha ah ee ku saabsan xadka dammaanadda deymaha ee lagu bixin karo magaca Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, iyo sidoo kale shuruudaha iyo waajibaadka guud ee lagu maamulayo dammaanada deymaha, ee uu soo ban-dhigaayo Wasiirka Maaliyaddu, waxa ay dhaqangal noqonayaan oo keliya marka uu Baarlammaanka Federaalka aqbalo uuna ku soo saaro Xeerka Qoondada Miisaaniyadda.

4. Iyadoo la raacayo qodobada ku xusan faqradaha sare ee Xeernidaamiyahan, Wasiirka Maaliyaddu, isaga oo ah ‘Dammaanad-bixiyaha Qaranka’, waxa si u gaar ah awood loogu siiyay in uu dammaanad qaad amaaheed ku bixiyo magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sidaas oo ay tahay, Wasiirka Maaliyadu waa in uu ku shaqeeyo xadka dammaanadeed ee sannadlaha ah, ee uu dejiyo Baarlammaanka Federaalka, iyo sidoo kale in uu si adag ugu hoggaansamo shuruudaha iyo wajibaadka guud ee lagu maamulayo dammaanadda deymaha, ee ku soo baxay Xeerka Qoonadada Miisaaniyadda ee baarlammaanku dejiyay.

5. Dhammaan dammaanad qaadka deymaha ee uu Wasiirka Maaliyadu ku sameeyo magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa in sharci ahaan loo fuliyo, haddii ay dammaanadahaasi u hoggaansanyihiin xaddidaada sannadlaha ah ee heerka dammaanadda deymaha; iyo shuruudaha iyo waajibaadka guud ee dammaanad-qaadka ammaahda ee uu dejiyay Baarlammaanka Federaalku, kuna soo baxay Xeerka Qoonadada Miisaaniyadda. Heshiisyada noocaan ahi waxa ay dhaqan-gal ku noqonayaan si waafaqsan shuruudahooda, iyada oo aan loo baahan tallaabooyin kale oo sharci ama maamul oo lagu ansixinaayo.

6. Qeybta Maaraynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, waa in ay qiimeeyaan oo soo saaraan kharash ahaan khatarta daynta ee Jamhuuriyadda Fedraalka Soomaaliya ee la xiriirta bixinta dammaanad kasta oo ammaah ah. Qiimaynta QMD ay sammaynayso, waa in ay ku jirto mid dhammaystiran oo ku saabsan khataraha la socda dammaanadda deynta inta aan wax dammaanad-qaad ah la sammaynin, waana in tirada lagu daro diyaarinta qorshe keyd ah oo dayn bixineed oo

suurtagal ah in loo baahdo haddii la dammiintuhu deynta bixin waayo, waana in la xaddido kharashka ku bixi kara qaadashada culayska halkaas ka imaan kara.

7. Wasiirka Maaliyaddu waxa uu u gudbinayaa heshiisyada Dammaanadaha uu ku bixiyay magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Garyaqaanka Guud ee Dawladda isaga oo ka eegaya in dammaanad-qaadyadaasi ay waafaqsanyihiin heerkii loo xadeeyay dammaanadaha sanadkii ay dawladdu bixin karto iyo in ay dammanadahaasi waafaqsanyihiin shuruudaha iyo waajibaadka guud ee dammaanadda deymaha ee uu Baarlammaanka Federaalku ku dejiyay Xeerka Qoondada Miisaaniyadda. Marka ay soo dhammaato qiimayntaasi, Garyaqaanka Guud ee Dowladdu waxa uu soo saarayaa talo-bixin sharci oo xaqiijinaysa sida hadba dammanadaha dawladdu bixisay ay u waafaqsanyihiin xadka dammaanadaha ee hore loo ansixiyay iyo shuruudaha kaleba.

8. Dammaanad-qaad kasta oo lagu sameeyo magaca Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu si dhakhso ah ugu war-geliyo Baarlammaanka Fadaraalka ah. Muddo ku siman laba todobaad, oo ka bilaabanta marka uu dhaqan-galo heshiiska dammaanaddu, Wasiirku waa in uu nuqul ka mid ah heshiiska u gudbiyo Baarlammaanka Federaalka ah.

9. Hanti-dhowrka Guud waa in uu diiwaan-geliyo dhammaan heshiisyada dammaanad qaadka ammaahda ee lagu bixiyay magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Laba toddobaad gudahood oo ka billaabanaysa marka la fuliyo heshiis dammanaadeed oo noocaas ah, Wasiirka Maaliyaddu waa inuu nuqul ka mid ah heshiisyada u gudbiyaa Hanti-Dhowrka Guud ee Qaranka si uu u diiwaan-geliyo.

## Qodobka 7aad
## Habraaca lagu maamulayo Bixinta Dammaanad-qaadyada aan Deynta ku saabsanayn.

1. Iyada oo la tixraacaayo Qodobka 37 (6) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, erey-bixinta ah "Masuuliyad-qaadista culaysyada kale ee lama filaanka ah – "Other contingent liability", ama Mas'uuliyad kale ee dhaqaale "or other financial liability", halkan waxa lagu qeexay in loola jeedo dammanad-qaadyada aan deynta ku saabsanayn. Si loo dardar-geliyo meelmarinta Xeernidaamiyaha Maaraynta Maaliyadda Guud

gaar ahaan Qodobka 37(6), Wasiirka Maaliyaddu waxa uu awood u leeyahay aqoonsashada iyo kala saaritaanka noocyada kala duwan ee dammaanad-qaadyada aan deyn toos ah ku saabsanayn iyo qeexitaanka shuruudaha iyo waajibaadka guud ee lagu maamulayo dammaanad qaadka noocaas oo kale ah. Hadaba, noocyada loo asteeyo in ay yihiin 'Dammaanad-qaad' aan deyn ku saabsanayn, iyo sidoo kale shuruudahiisa iyo waajidkiisa guud waa in uu Baarlamaanka Federaalka ahi ku ansixiyaa Xeerka Qoonadada Miisaaniyadda ee sanadlaha ah.

2. Ka dib ansixinta Baarlammaanka Federaalka ah, Wasiirka Maaliyadda, isaga oo ah 'Dammaanad-bixiye Qaran', waxa awood u gaar ah loo siiyay bixinta ama aqoonsashada dammaanad-qaad aan deyn ku saabsanayn oo khaas ah, kuwaas oo hoos imaanaya 'Dammaanad-qaadyada aan deynta ku saabsanayn' ee hore loo ansixiyay, waxaanu gudashada hawshaas wakiil kaga yahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sidaas oo ay tahay, Wasiirka Maaliyaddu marka uu gudanaayo waajibaadkaas, waa in aanu ka bixin xeendaabka shuruudaha iyo waajibaadka guud ee hagaya nooca dammaanad-qaadka aan deynta ahayn ee uu Baarlammaanka Federalka ahi ku ansixiyey Xeerka Qoonadada Miisaaniyadda.

3. Qeybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, iyada oo la tashanaysa xafiisyada awoodda u leh hawlahaas ee wasaaradda iyo hay'adaha kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa in ay qiimayso halista ka imaan karta dammaanad kasta oo aan deyn ku saabsanayn oo la bixinayo; waxayna sidoo kale go'aamin doontaa, qaddarka lacageed ee khidmad ahaan hawlahaas ugu bixi kara, si loo daboolo kharashyada loo baahan karo, loona yareeyo halisaha jiri kara. Qiimayntaas dhamayska tiran oo ay ku jirto ku xisaabtanka khidmadaha suurtagalka ah, waa in la sameeyo ka hor inta aan la bixinin ama la oggolaanin dammaanad-qaadka aan deynta ahayn.

4. Dhammaan dammaanad-qaadyada aan daynta ahayn, ee ku jira xeendaabka noocyada la ansixiyay ee uu Wasiirka Maaliyaddu bixiyo ama soo saaro isaga oo wakiil ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo la raacayo shuruudaha iyo waajibaadka guud ee uu baarlamaanka federaalku ku ansixiyay Xeerka Qoondada Maaliyadda, waxa ay noqonayaan kuwo sharci ah. Heshiisyada sharciga ah ee dammaanad-qaadyada aan deynta ahayni waa in ay sidooda u dhaqan-galaan, si waafaqsan shuruudahooda iyada oo aan loo baahnayn tallaabooyin kale oo sharci ama maamul oo ansixin ah.

5. Ka dib marka uu codsado Wasiirka Maaliyaddu, is la markaana ay u muuqato in ay munaasib tahay, Garyaqaanka Guud ee Dawladdu waxa uu sammayn karaa qiimayn uu ku eegaayo u hoggaansanaanta heshiis kasta oo dammaanad aan dayn ahayn, oo uu soo saaray Wasiirka Maaliyaddu, isaga oo Garyaqaanka Guud ka eegaya in ay waafaqsanyiin shuruudaha guud ee loo dejiyey nooca dammaanadda aan deynta ahayn ee uu Barlaamanka Federalkka ahi ku ansixiyey Xeerka Qoonadada Maaliyadda. Markaas ka dib, Garyaqaanka Guud waxa uu soo saarayaa talo sharci oo arrintaas ku aaddan.

6. Wasiirka Maaliyaddu waa in uu si deg-deg ah u ogeysiiyaa Baarlamaanka Federaalka waajibaad kasta oo dammaanad-qaad aan deyn ahayn oo lagu fuliyay ama lagu oggolaaday Magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Muddo laba todobaad gudahood ah oo ka billaabanta marka uu fulo heshiiskaasi, Wasiirku waa in uu u gudbiyo nuqul ka mid ah heshiiska Baarlammaanka Federaalka.

7. Hanti-dhowrka Guud waa inuu diiwaan-geliyaa dhammaan heshiisyada ka kooban dammaanad-qaadyada aan daynta ahayn ee la gu soo saaray Magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laba toddobaad gudahood marka la fuliyo heshiisyada noocaas ah, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu nuqul ka mid ah heshiisyada u gudbiyaa Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka si uu u diiwaan-geliyo.

8. Qodobada ku qoran faqradaha kor ku xusan, wax samayn ah ma ku yeelanayaan caymiska khatarta siyaasadeed ee ay bixiso Hay'adda Dammaanad-qaadka Maalgashiga Dhinacyada Badan (HDQDB) ee loo yaqaano MIGA ee loo sameeyo maalgashadayaasha imaanaya Soomaaliya, sida uu dhigayo heshiiska dammaanadda ee u dhaxeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo HDQDB.

## Qodobka 8aad
## Qaab-dhismeedka Maareynta Dammaanadda.

1. Dammaanad qaadku, haddii uu yahay mid ammaah ku saabsan iyo hadii aanu amaah ku saabsanaynba, waa in lagu bixiyaa oo kaliya si ay u taageeraan ujeeddooyinka Qorshaha Horumarinta Qaranka.

2. Diiwaanka dhammaan dammaanadaha deymaha iyo kuwa aan deymaha ahayn ee lagu bixiyay Magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,

sida ku cad Xeernidaamiyahan, waa in uu hayo Xisaabiyaha Guud sannad kastana lagu soo saaro warbixin sanadeedka  xisaab-xirka Miisaaniyadda ee laga sameeyo dhaqdhaqaaqa Khasnadda Mideysan ee dawladda (Treasury Single Account).

3. Iyadoo aan waxba loo dhimayn mas'uuliyadda Xisaabiyaha Guud ee ku cad Xeernidaamiyahan qodobkiisa 3aad, Wasaaradda Maaliyaddu, iyada oo adeegsanaysa Qeybta Maareynta Deynta (QMD) waa in ay samayso oo joogtayso diiwaan-gelinta xogaha warbixinno daahfurnaan ku salaysan iyo dabagalka dhammaan dammaanadaha ammaahda iyo kuwa aan ammaahda ahayn iyada oo la raacaayo Xeernidaamiyahan lagu sameeyay ama lagu oggolaaday Magaca Jamhuuriyadda  Fedaraalka  Soomaaliya. Tan waxa looga jeedaa in si wax-ku-ool ah loola socdo sida ay u shaqaynayaan dammaanad-qaadyada la bixyay ee deyn ku salaysan iyo kuwa aan deyn ku salaysnaynba, taas oo ka caawinaysa Qeybta Maareynta Deymuhu in ay samayso qiimayn dhammeystiran oo ku saabsan khataraha ku lammaan dammaanad-qaadyada cusub ee noocaas oo kale ah ama u baahan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya in ay xilkeeda uga gudato sida kuwaas hore oo kale, sida uu Xeernidaamiyahan ku waajibiyay.

## Qodobka 9aad
## Dabagalka, Diiwaan-gelinta iyo ka Warbixinta Deynta

1. Dhammaan amaah soo shubista (All loan disbursements) iyo isbeddel kasta oo lagu sameeyo shuruudaha iyo waajibaadka uu dhigaayo heshiiska deyntaas, waa in ay maareyso Qeybta Maareynta Deymaha (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu.

2. Dhammaan ammaahaha iyo qaamaha maaliyadeed (financial liabilities), oo ay ku jiraan dammaanadaha deynta iyo kuwa aan deynta ahaynba waa in loo diiwaan-geliyo si sax ah, si joogto ahna ay u la socoto Qeybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, si loo hubiyo isla xisaabtanka maaliyadeed, loona qiimeeyo badqabka maaliyadeed ee Jamhuuriyadda Fedaraalka Soomalaiya, deymaha in loo maareeyo si waafaqsan shuruucda dalka, iyo ka gaashaamashada qataraha maaliyadeed ee imaan kara.

3. Qeybta Maamulka Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu waa inay daabacdaa xogta deynta qaranka oo Saddex-biloodle ah, waana in ay

warbixinta ku soo saarto muddo afar todobaad ah gudahood oo ka billaabanaysa dhammaadka saddexda bilood ee warbixintu ku saabsan tahay.

## Qodobka 10aad
## U sii igmasho Masuuliyadeed

1. Haddii ay jirto xaalad aanu Wasiirku qaban karin shaqadiisa, sida xanuun, safar ama xaalad kale oo la soo deristay oo aan sinaba looga fursan karayn darteed, xilalkiisa midkood ama dhamaantood ee ku saabsan ammaahaha ama heshiisyada damaanad-bixinta, Wasiirka Maaliyaddu waxa uu u idman karaa dadka ay shaqo-wadaagta yihiin, sida Wasiir ku-xigeenka, Wasiiru-dowlaha ama sarkaal kale oo ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda. Sidaas oo ay tahay, xaaladda caynkaas ahi Wasiirka ma ka dul qaadayso awoodihii iyo masuuliyaddii guud ee uu Xeernidaamiyahan ku waajibiyay. Iyadoo taas maanka lagu hayo, Wasiirku marka uu masuuliyad cayiman cid u igmanaayo, waxa uu soo saarayaa Wareegto Wasiir oo faahfaahsan, taas oo xaddideysa awoodiisa uu cid kale ku wareejinayo iyo waajibaadka taas khuseeya ee Xeernidaamiyahani tilmaamaayo.

## Qodobka 11aad
## Fullinta iyo Dhaqan-gelinta Xeer-nidaamiyahan

1. Xeerkani waxa uu dhaqan-gal noqonayaa kadib marka ay meel-mariyaan Golaha Wasiiradda Xukuumadda JFS, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyo Mareegta Rasmiga ah ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

2. Qodobada Xeernidaamiyahan waxa ay isbeddel ku samaynayaan, amaba gebi ahaanba meesha ka saarayaan wixii qodobo ah ee ay xeernimaadiyahan iska horimaanayaan ee ku jira Xeernidaamiyaha Maamulka Maaliyadda Guud ee 2022.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 161 Taariikh: 19/07/2024

**XEER: SIYAASADDA QARAN EE IIBKA HUBKA, RASAASTA, IYO QALABKA CIIDANKA**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA BIXID 05 AUG 2024 EXIT OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (g); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

**Markuu arkay:** Soojeedinta Wasaaradda Gaashaandhigga ee JFS;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.24.81.07.24** ee **19/07/2024**, kuna saabsan **Siyaasadda Qaran ee Iibka Hubka, Rasaasta, iyo Qalabka Ciidanka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Muhiimadda ay u leedahay Dalka xakameynta hubka sharci-darrada, si loo sugo, loona ilaalsho kala-dambaynta, nabadgalyada guud, iyo Amniga Qaranka;

**Waxa uu Meelmariyay:**

**Qodobka 1aad:**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.24.81.07.24** ee **19/07/2024**, kuna saabsan **Siyaasadda Qaran ee Iibka Hubka, Rasaasta, iyo Qalabka Ciidanka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

**Qodobka 2aad**
**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Gaashaandhigga loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Siyaasadda Qaran ee Iibka Hubka, Rasaasta, iyo Qalabka Ciidanka.

**Qodobka 3aad**
**Dhaqangal**

Siyaasaddan Qaran waxa ay dhaqangalaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-460-2024
TAARIIKH : 29-08-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Wasaaradda Gaashaandhigga**
**Xafiiska Wasiirka**

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**وزارة الـدفاع**
**مكتب الوزير**

**Federal Republic of Somalia**
**Ministry of Defense**
**Office of the Minister**

**REF: WG/XW/00256/ 07/24** **Tr: 18/07/2024**

**Ku: Ra'iisul Wasaaraha XJFS**

**Og: Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS**

**Ujeeddo: Soo Gudbin Siyaasadda Iibka Hubka, Rasaasta iyo Qalabka Ciidanka**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**

Salaan qadarin leh kadib, Wasaaradda Gaashaandhigga Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS), waxay si xushmad leh halkan ku soo gudbineysaa Siyaasadda Iibka Hubka, Rasaasta iyo Qalabka Ciidanka.

Diyaarinta siyaasaddan waxaa diyaariyey sharci yaqaannada iyo khubarada Wasaaradda Gaashaandhigga JFS si qoto dheerna u lafa guray.

Haddaba, Mudane Ra'iisul Wasaare, Siyaasadda oo la mariyey dhammaan habraacyadii looga baahnaa, Wasaaradda Gaashaandhigga Xukuumadda JFS waxay ka codsaneysaa Xafiiskaaga in siyaasaddan loo gudbiyo Xubnaha Golaha Wasiirada sharafta leh si loo ansixiyo.

**Mahadsanid.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA جمهورية الصومال الفدرالية OFFICE OF MINISTER XAFIISKA WASIIRKA وزارة الدفاع MINISTRY OF DEFENCE WASAARADDA GAASHAANDHIGA

**Mudane C/qaadir Maxamed Nuur**
**Wasiirka Gaashaandhigga XJFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

# Siyaasadda Iibka Hubka, Rasaasta iyo Qalabka Ciidanka

Waxaa diyaarisay:

Wasaaradda Gaanshaandhigga ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Luulyo, 2024

# Tusmo


*Qeexitaanno* ........ *2*

*Cutubka 1aad: Hordhac* ........ *2*

Gogoldhig ........ 2

Sababta ka Dambaysa Samaynta Siyaasaddan ........ 3

Hannaanka Dejinta Siyaasadda ........ 3

Gorfeynta Xaaladaha ........ 4

*Cutubka 2aad: Ujeedada, Mabaadi'da, Seeraha iyo Qaabdhismeedka Sharci* ........ *5*

***Ujeedada Siyaasadda*** ........ ***5***

***Mabaadii'da Hagaysa*** ........ ***5***

***Seeraha Siyaasadda*** ........ ***6***

***Qaabdhismeedka Sharci ee Siyaasadda*** ........ ***6***

*Cutubka 3aad: Maamulka iyo Maareeynta Hannaanka Iibka* ........ *7*

Hawlaha La Qabanayo Iibka Ka Hor ........ 7

Hawlaha La Qabanayo Xiliga Iibka ........ 8

Hawlaha La Qabanayo Iibka Ka Dib ........ 9

*Cutubka 4aad: Agaasinka Hay'adeed ee Fulinta Siyaasadda* ........ *10*

Xogaha Hubka, Rasaasta iyo Qalabka ........ 11

Warshadeynta iyo Dhoofinta Hubka, Rasaasta iyo Qalabka Ciidan ........ 11

Dib-u-eegista Siyaasadda Iibka Hubka iyo Rasaasta ........ 11

## Qeexitaanno

**JFS:** Waxaa laga soo gaabiyay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**XFS:** Waxaa laga soo gaabiyay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

**Dawlad Goboleedyada:** Waxaa loola jeedaa dawlad goboleedyada xubinta ka ah dawladda federaalka Soomaaliye.

**Rasaas:** Rasaas waxaa loola jeedaa agabka loo isticmaalo in laga rido hubka yar-yar iyo kan waaweyn sida qoryaha iyo madaafiicda.

**Shahaadada Adeegsadaha (End Use Certificate {EUC}):** Waxaa loo la jeedaa dukumeenti cadeynaya in hubka, rasaasta iyo qalabka la soo iibiyay loo adeegsan doono keliya ujeedooyinka la cayimay ayna adeegsan doonaan hay'adaha loo idmaday ee ka shaqeeya amniga qaranka. Tani waxay dawladda ka caawinaysaa ka hortagga leexsiga iyo si xun u adeegsiga hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka.

**CQS:** Waxaa laga soo gaabiyay Ciidanka Qalabka Sida waxaana loola jeedaa Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**Qalab:** Qalabka ciidanka waxaa loola jeedaa waxa aan ka ahayn dirayska ciidanka, raashinka, adeegyada guud, qalabka xafiisyada iyo gaadiidka aan loo adeegsan ujeedooyinka ciidanka sida ku xusan qodobka 5aad ee Sharciga Iibka ee Qaranka (2016).

**Hay'adaha Amniga:** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Gaashaandhigga oo ay hoos yimaadaan Ciidanka Qalabka Sida (SNAF), Wasaaradda Amniga Gudaha oo ay hoos yimaadaan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed (SPF) iyo Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka (NISA) iyo Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka oo ay hoos yimaadaan Ciidanka Asluubta.

**Hub:** Waxaa loola jeedaa wax kasta oo dhimasho ama dhaawac geysan kara ayna sida caadiga ah isticmaalaan Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed.

## Cutubka 1aad: Hordhac

### Gogoldhig

Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay garawsan tahay, tan iyo markii la billaabay dib-u-dhiska dawladeed, in dalku uu mar kasta horay u sii socday in kasta oo ay jiraan caqabado badan oo ku gedaaman hannaanka dib-u- soo-nooleynta qarannimada iyo gobonimada Soomaaliyeed.

Iyada oo laga duulaayo mabda'a horay u socodka qaranka, Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay ku hawlan tahay yareynta ama baabi'inta caqabadaha ugu waaweyn ee heysta dhammeystirka dib-u-dhiska Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed.

Wasaaradda Gaashaandhigga waxay halkaan ku soo bandhigeysaa Siyaasadda Iibka Hubka iyo Rasaasta oo ay meel-mariyeen Golaha Wasiirada JFS. Siyaasadani marka ay dhaqangasho waxay awood u siinaysaa Dawladda in ay la socoto, xakamaysana hubka iyo rasaasta sharcidarada dalka ku soo gala, maaraysana hannaanka iibka hubka iyo rasaasta hay'adaha amniga dalka iyada oo yareenaysa halista in hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka ay ku dhacaan gacmo qaldan iyo in la hubiyo in hubka, rasaasta iyo qalabka loo adeegsado ujeedooyinka sharcigu qeexay.

Siyaasadda iibka hubka iyo rasaasta waxay qeexaysaa hannaanka ay hay'adaha amniga dalka ku soo iibsanayaan hubka, rasaasta iyo qalabka ay u baahanyihiin.

Siyaasaddan waxaa looga gol-leeyahay inay midayso oo qeexdo hannaanka iibka, hagtana hawl-wadeenada hay'adaha amniga iyo qandaraasleyda marka ay ku hawlan-yihiin iibka hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka.

Siyaaddani waxay xaqiijinaysaa in hannaanka iibka hubka, rasaasta iyo qalabka ciidank loo fuliyo si waafaqsan Sharciga Iibka Qaranka iyo shuruucda kale ee dalka u yaal.

## Sababta ka Dambaysa Samaynta Siyaasaddan

Sababta ugu wayn ee dejinta siyaasadda Iibka Hubka iyo Rasaasta waxay qayb wayn ka tahay dadaalada dowladda federaalka ugu jirto dejinta shuruuc, siyaasado iyo nidaamyo adag oo lagu xakamaynayo hubka sida sharci darada ah ku soo gala dalka ka dib qaadista cuna qabataynta hubka ee dalka saarnayd bishii Diseembar 2023. Siyaasaddu waxay ka hortagaysaa hubka, rasaasta iyo qalabka usoo degi kara kooxaha argagixisada sida kooxda nabad diidka Al-shabaab iyo Daacish iyo kooxaha kale ee lidka ku ah nabadgalyada dalka.

Xakamaynta iibka hubka iyo rasaastu waa mid lagama maarmaan u ah xaqiijinta waajibka dastuuriga ah ee dowladda ka saaran ilaalinta nabadgalyada iyo badqabka muwaadinka Soomaaliyeed iyo dadka kale ee kula nool dalka. Iibka Hubka, rasaasta iyo qalabka oo lagu soo koobo gacanta dowladda federaalka waa mid lagama maarmaan u ah wiiqista kooxaha argagixisada, burcad badeedka iyo kooxaha denbiyada kale ee abaabulan fuliya, kuwaas oo si firfircoon ugu lug leh iibka, soo dejinta iyo ka ganacsiga hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka.

Sidoo kale, nidaaminta hannaanka iibka hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka waa mid wax badan ka taraya soo afjaridda guud ahaan colaadaha ka jira dalka oo ay markiisii horeba hurintiisa qayb wayn ka qaadatay hubka sida sharci darada ah ku soo gala dalka. Sidoo kale, waa mid qayb wayn ka qaadanaya xasilinta gobolka geeska Africa maadaama hubka soo gala Soomaaliya loo sii gudbiyo wadamada deriska, kaas oo ku haya xasilooni darro nabad galyada gobolka. Haddaba, siyaasaddu waxay xaqiijinaysa in dowladda federaalka oo keliya ay mas'uul ka tahay hannaanka iibka iyo keenidda dalka hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka.

## Hannaanka Dejinta Siyaasadda

Wasaaradda Gaashaandhigga waxay u martay dejinta siyaasadda iibka hubka iyo rasaasta hab ku dhisan wada tashi lala yeeshay dhammaan hay'adaha iyo daneeyayaasha ay khusayso. Samaynta Siyaasadda Iibka Hubka iyo Rasaasta waxay soo bilaabatay bishii Juun 2023 iyadoo waaxyaha Iibka,

Qorshaynta iyo la-taliyayaasha Wasaaradda Gaashaandhigga ay yeesheen kulan dood iyo aragti wadaag ku aadan baahida loo qabo samaynta siyaasaddan iyo hannaanka habboon ee loo marayo. Si loo hubiyo in siyaasaddan ay la jaan qaadayso xeerarka iyo siyaasadaha qaran iyo kuwa caalamiga, waxaa la sameeyay cilmi-baaris qoto dheer si loo qeexo ujeedada siyaasadda, caqabadaha iyo dal daloolooyinka jira. Waxaa is barbar dhig lagu sameeyay nidaamyada kala duwan ee dunida ka jira ee dowladahu ku nidaamiyaan iibka hubka iyo rasaasta iyo duruufaha u gaarka Soomaaliya si loo helo siyaasad wax-ku-ool ah oo la jaan qaadaysa duruufta qaranka.

Nuqulka ugu horeeyay ee siyaasadda waxaa loo bandhigay Hay'adaha Amniga Dalka iyo Xafiiska Amniga Qaranka si ay uga tala bixiyaan. Wasaaraddu waxay siyaasadda ku dartay dhammaan talooyinkii suubanaa ee la soo jeediyay.

## Gorfeynta Xaaladaha

**Baahida Hubka, Rasaasta iyo Qalabka Ciidamada:** Ciidamada qaranka ayaa baahi degdeg ah u qaba helidda hub, rasaas iyo qalab ku haboon si ay u gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah ugana jawaabaan khataraha amni ee jira. Qaadista cunaqabateynta hubka ee dalka saarnayd mudada dheer, waxay dawladda siineysaa fursad muhiim ah si ay wax uga qabato baahidaas, awoodna u siinaysaa soo iibinta hub, rasaas iyo qalab lagama maarmaan ah oo hore loo xaddiday.

**Qaadista Cunaqabataynta Hubka:** Haddaba, haatan oo la qaaday cunaqaybtii hubka (Diseembar 2023) ee mudada dheer saarnayd Soomaaliya si awood dheeraada loogu siiyo dowladda la dagaalanka argagixisada, waxay dowladdu wajahaysaa caqabado badan oo ku aadan sidii ay u xaqiijin lahayd inaan qaadista cunaqabaynta noqon mid ay uga faa'iidasytaan kooxaha argagixisada iyo kooxaha kale aa khatarta ku ah amniga soo iibsiga iyo soo gelinta dalka hub badan.

**Lawareegidda Mas'uuliyadda Amniga Dalka:** Iyadoo la filayo in ciidamada qaranka ay mas'uuliyadda amniga dalka ay kala wareegaan Hawlgalka Ku-meelgaarka ee Midowga Afrika (ATMIS) Diseembar 2024, dawladda federaalka waxay hoosta ka xariiqday baahida degdegga ee loo qabo dejinta iyo hirgelinta siyaasaddan si loo hubiyo hubeynta iyo qalabeynta ciidamada amniga dalka.

**Hubka Sida Sharci darada ah ku soo Gala Dalka:** Hubka sharci darrada ah ee ka soo gala xuduudaha furan ee dalka ayaa inta badan gacanta u gala maleeshiyaadka qabaa'ilka iyo kooxaha argagixiso ee ku hawlan falal liddi ku ah nabadgalyada iyo xasiloonida dalka. Hubkan sida sharci darada ah ku soo gala dalka ayaa sii hurinaya colaadaha qabaa'ilka iyo weerarada argagixiso ee ka dhanka ah nafta iyo hantida dadka rayidka ah. Dejinta siyaasadda iibka hubka iyo rasaasta ayaa gacan ka gaysanaysa nidaaminta hannaanka iibka hubka, rasaasta iyo qalabka, sidookale yareenaysa hubka sida sharci darrada dalka ku soo gala.

**Amni Xumo:** Hubka ku jira gacanta kooxaha argagixisada iyo maleeshiyo beeleedyada waxay gaystaan amni xumo baahsan oo galaafata nolosha dadka iyo duunyada, waxaana sanad walba uu hubkas keenaa dhimashada iyo dhawaaca dad badan, barakac iyo burbur hantiyeed. Dejinta siyaasadda iibka hubka iyo rasaasta waxay wax ka qabanaysaa caqabadan iyadoo midaynaysa hannaanka iibka hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka.

## Cutubka 2aad: Ujeedada, Mabaadi'da, Seeraha iyo Qaabdhismeedka Sharci

### Ujeedada Siyaasadda

#### Ujeedada Guud:

Ujeeddada siyaasadan waa in la helo hannaan qeexan oo lagu xaqiijiyo in hay'adaha amniga dalka ay helaan hubka, rasaasta iyo qalabka lagama maarmaanka u ah si ay u gutaan mas'uuliyadooda dastuuriga ah iyagoo agabka la soo iibsaday ama la heysto loo maareynayo si waafaqsan siyaasaddaan iyo xeerarka dalka.

#### Ujeedooyinka Gaarka ah:

1. In la dejiyo siyaasad qaran oo lagu midaynayo, maamulayo laguna maareenayo hannaanka soo iibsiga hubka, rasaasta iyo qalabka ee hay'adaha amniga dalka.
2. In sare loo qaado hufnaanta, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka hannaanka iibka hubka, rasaasta iyo qalabka ee hay'adaha amniga dalka.
3. Ka hortagga iyo xakamaynta hubka sida sharci darrada ah dalka ku soo gala.
4. In sare loo qaado kartida, awoodda iyo diyaar garowga hawlgal/dagaal ee hay'adaha amniga dalka.
5. In loo hoggaansamo shuucda iibka ee qaranka iyo xeerarka kale ee dalka u yaal.

### Mabaadii'da Hagaysa

Iibka hubka iyo rasaasta ay samayso Wasaaradda Gaashaandhigga waxaa hagi doona mabaadii'da soo socda:

1. **Daahfurnan:** Wasaaradda Gaashaandhigga waxay dhaqan gelinaysaa mabaadii'da daahfurnaanta iibka intii suuragal ah ee la jaanqaadeysa danta amniga iyo difaaca qaranka, waafaqsana sharciga iibka ee qaranka iyo shuruucda kale ee dalka u yaal. Wasaaradda ayaa la wadaagaysa warbixinta hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka Guddigga Difaaca ee Baarlamaanka JFS. Sidookale, dhammaan shuruudaha tartamaha iyo hannaanka iibka hubka, rasaasta iyo qalabka waxay noqon doonaan kuwo cad oo faahfaahsan si loo fududeeyo fahamka u dhexeeya Wasaaradda Gaashaandhigga iyo qandaraasleyda. Qandaraasleyda waxay si cad u ogaan doonaan nooca, tirada iyo tayada hubka iyo rasaasta ay Wasaaradda Gaashaandhiggu doonayso inay iibsato iyo nidaamka guulaystaha lagu xulan doono.

2. **Tartan:** Hannaaanka iibka hubka, rasaasta iyo qalabka wuxuu xaqiijin doonaa in dhammaan qandaraasleyda ay u tartamaan si cadaalad ah oo suuragalinaysa in dhammaan qandaraasleyda xaqa u leh inay ka qaybgalaan tartanka la siiyo fursad ay uga qaybgalaan hannaanka iibka.

3. **Dhaqaalle:** Iibka hubka, rasaasta iyo qalabka wuxuu qayb muhiim ah ka yahay qarashaadka ay gasho Dowladda Federaalka Soomalia, sidaa darteed, Wasaaradda Gaashaandhiggu waxay samayn doontaa dadaal kasta si ay u xulato tartamaha ugu qiimaha hooseeya iyada oo tayada aysan waxba iska dhimayn. Sidookale, Wasaaradu waxay isu dheellitireysaa kharashka, tayada, iyo wax ku oolnimada hubka, rasaasta iyo qalabka ee hay'adaha amniga loo soo iibinayo.

4. **Amniga Qaranka:** Wasaaradda Gaashaandhigg marka ay gaareyso go'aan qandaraas bixin, waxay ka baaraandageysaa saameynta amni ee ka imaan karta hubka iyo rasaasta ee la soo iibinayo, iyada oo ka taxaddareysa khatar kasta oo amni sida weerar, xatooyo, dayac ama basaasnimo laga dhex fuliyo waxa la soo iibsaday. Ka hor inta aan la bixin wax qandaraas ah, Wasaaradda Gaashaandhiggu waxay hubinaysaa inay u dhamaystiranyihiin dhammaan sharciyada iyo habraacyada amni ee laga maarmaanka u ah iibinta hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka.

5. **Isla-Xisaabtan:** Wasaaradda Gaashaandhigga waxay ku maareyneysaa hannaanka iibka hubka iyo rasaasta nidaamka ku qoran siyaasaddaan, iyada oo tallaabooyin sharciga waafaqsan ka qaadeysaa cid kasta oo ku xadgudubta ama dayacada qaybo ka mid ah hannaanka xulashada tartamayaasha, wuxuu masuul ka noqon doonaa/doontaa ficilkiisa/keeda ama ficil la'aantiisa/teeda.

6. **Cadaalad:** Hanaanka iibka hubka, rasaasta iyo qalabka Wasaaradda Gaashaandhigga wuxuu noqon doonaa mid dhex-dhexaad ah oo oo waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraas Bixinta ee Qaranka. Hannaanka iibku wuxuu dammaanad qaadayaa in si caddaalad ah oo siman loola dhaqmo dhammaan qandaraasleyaasha daneynaya ee buuxiyay shuruudaha dalabka in ay ka qeybqaataan tartanka la soo bandhigay, iyada oo aan cidna lagu takoorin sababo si gaar ah loogu beegsanayo.

## Seeraha Siyaasadda

Siyaasaddan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan qandaraasyada iibka hubka, rasaasta, iyo qalabka ee hay'adaha amniga dalka ee heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed. Siyaasaddaan ma khuseyso iibka aan aheyn hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka.

## Qaabdhismeedka Sharci ee Siyaasadda

Siyaasadan waxay ku salaysantahay shuruucda heer qaran iyo xeerarka heer caalami ee hoos ku xusan.

### Shuruucda Heer Qaran

**Dastuurka:** Dastuurku waa sharciga dalka ugu sareeya marka Shareecada Islaamka laga yimaado, waana halka laga soo dheehdo siyaasadaha, xeerarka iyo habraacyada ay ku shaqaynayaan hay'adaha dawladda federaalka. Sida ku xusan qodobka 126aad ee Dastuurka ku-meelgaarka JFS hay'adaha amniga waxay damaanad-qaadayaan nabadda, gobannimada iyo ammaanka qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo badbaadinta shacbigeeda. Hay'adaha amniga dalka si ay u gutaan waajibkaan dastuuriga ah waa in ay helaan agabka aasaasiga si loo kobciyo awoodooda hawgal ee ka hortagga iyo ka jawaabista khataraha amni ee ka dhanka ah nabadgalyada iyo xasiloonida JFS. Dejinta Siyaasadda iibka hubka, rasaasta iyo qalabka waxay gacan ka gaysanaysaa daboolidda baahida agab ee hay'adaha amniga dalka.

**Sharciga Iibka Qaranka**: Sharcigan wuxuu dhiirigelinayaa daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka qandaraasyada iibika qaranka si loo ilaaliyo hantida dadweynaha. Siyaasadan waxay la jaan-qaadaysaa mabaadi'daas sida ku xusan cutubka 2aad, qodobkiisa 2aad ee siyaasadan.

**Heshiiska Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka:** Heshiiskan wuxuu qeexayaa qaab-dhismeedka amniga qaranka ee heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed si waafaqsan dastuurka JFS. Heshiiskan ayaa ujeedkiisu yahay in la abuuro hannaan midaysan oo isku xira dhammaan hay'adaha amniga ee labada heer. Siyaasadan waxay fududeenaysaa isu-duwidda, isku-xirka iyo midaynta hannaanka iibka hubka, rasaasta iyo qalabka ee hay'adaha amniga dalka ee labada heer.

### Xeerarka Heer Caalami

**Qaraarka Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay:** Qaraarka Golaha Amaanka Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 2713 iyo 2714 (2023) ayaa cunaqabatayntii hubka ee saarnayd JFS looga qaaday, mid kalana lagu saaray kooxaha argagaxisada iyadoo la garwaaqsaday hormarka uu dalka ka sameeyay dib u habaynta hay'adaha amniga dalka iyo maaraynta wax-ku-oolka ah ee hubka iyo rasaasta. Siyaasadan waxay xoojinaysaa u hogaansanaanta Dawladda Federaalka ee nidaamka caalamiga ah ee maaraynta hubka iyo rasaasta.

## Cutubka 3aad: Maamulka iyo Maareeynta Hannaanka Iibka

### Hawlaha La Qabanayo Iibka Ka Hor

1. **Gorfeynta Khataraha:** Gorfeynta khataraha jira waa shaqada ugu horeysa ay tahay in ay qabato hay'ad waliba oo amni si faham buuxa looga helo khataraha jira, kuwa soo food leh iyo sida ugu haboon ay tahay in looga jawaabo. Tani waxay ka caawinaysaa hay'adaha amniga dalka in la ogaado noocyada hubka, rasaasta iyo qalabka haboon si looga hortago loogana jawaabo khatarahaas amni ee ka dhanka ah nabad galyada iyo xasiloonida dalka loona hormariyo diyaar garowga hawlgal ee ciidamada amaanka.

2. **Qeexidda Baahida:** Hay'ad waliba oo amni waa in ay qeexdaa baahideeda hub, rasaas iyo qalab iyadoo lagu saleynayo qiimeynta halista amni ee jirta, baahiyaha hawlgalada, iyo hormarka tignoolajiyada kadibna u gudbisaa Wasaaradda Gaashaandhigga qorshe faahfaahsan oo dhamaystiran. Qorshaha waa in lagu qeexaa nooca, tirada, tayada loo baahanyahay. Qeexidda baahida waxay ka bilaaban kartaa heerka ciidamada amniga oo u soo gudbin doona Wasaaradda ay hoos tagaan. Hay'adaha amniga ee Dawlad Goboleed waxay marinayaan codsigooda Wasaaradaha heer Federaal ay hoostagaan.

3. **Qiimeynta Baahida:** Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed ayaa qiimaynaya baahida hub, rasaas iyo qalab ee loo soo gudbiyay kadibna u gudbinaya Wasaaradaha ay hoos tagaan oo hubin kadib u gudbin doona Wasaaradda Gaashaandhigga codsi qoraal oo faahfaahsan. Marka Wasaaradu qiimeeyso baahida loo soo gudbiyay ayna ku qanacdo in aan laga dabooli karin hubka, rasaasta iyo qalabka ee qaranku leeyahay, waxay ku daraysaa qorshaha istiraajiyadeed ee shanta-sano. Wasaaraddu waa in ay uga soo jawaabtaa codsiga loo soo gudbiyay ugu badnaan hal bil iyadoo xeerinaysa heerka baahida iyo khatarta looga jawaabayo.

4. **Diyaarinta Miisaaniyadda:** Hay'ad walba oo soo dalbaneysa hub, rasaas iyo qalab ciidan, waxaa laga doonayaa in ay hubiso in miisaaniyadeeda ku jirto qoondo lacageed oo ku filan dalabka ay sameysaneyso ka hor inta aysan soo gudbin.

5. **Samaynta Cilmi-baaris:** Khuburada Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa samaynaya cilmi-baaris la xiriirta iibka hubka, rasaasta iyo qalabka, hormarka tiknoolajiyada iyo qandaraaslayaasha buuxin kara shuruudaha la dejiyay.

6. **Diyaarinta Qorshaha:** Wasaaradda Gaashaandhigga oo ka duulayso baahida loo qabo tayaynta iyo qalabaynta hay'adaha amniga si kor loogu qaado tayadooda iyo awoodooda hawlgal iyo qorshayaashii loo soo gudbiyay ayaa hogaaminaysa diyaarinta qorshaha iibka hubka, rasaasta iyo qalabka. Qorshahaan ayaa ah shan-sano (5), wuxuuna hortabin u leeyahay XFS si loo helo hub, rasaas iyo qalab wax ku ool ah.

   Diyaarinta qorshaha waxaa qeyb ka ah baahida tababar ee loo qabo hubka, rasaasta iyo qalabka ee la soo iibin doono. Qorshan ayaa laga soo min-guurin doonaa qorshaha sanad laha ah ee hay'adaha amniga. Wasaaraddu waxay dib u eegis iyo cusboonaysiin ku samayn kartaa qorshaha iibka hubka, rasaasta iyo qalabka hadii ay timaado baahi dheeri ah ama deg-deg ah. Qorshahaan ayaa lagu jaangoyndoonaa awoodda miisaaniyaadeed ee JFS.

7. **Canshuur Dhaafka:** Dhammaan hubka, rasaasta iyo qalabka ciidamada qaranka Soomaaliyeed waxaa ka reeban in la canshuuro.

## Hawlaha La Qabanayo Xiliga Iibka

1. **Dhismaha Guddiga Farsamo ee Qandaraasyada Iibka Hubka, Rasaasta iyo Qalabka:**

   Si loo dhawro hantida dawladda korna loogu qaado daah-furnaanta iyo isla xisaabtanka, Wasiirka Gaashaandhigga ayaa soo magacaabaya guddigga farsamo ee qandaraaska. Xubnaha guddigan ayaa ka koobana:
   a. Xubno ka socda Wasaaradda Gaashaandhigga , oo uu ka mid noqonayo qofka guddiga gudoomiyaha u ah.
   b. Laba (2) xubin oo ka socota hay'adda wax loo iibinayo; iyo
   c. Xubin ka socota Wasaaradda Maaliyadda.
   d. Cidii kale ee wasiirka gaashaandhiggu u arko in aan laga maarmin.

2. **Waajibaadka Guddiga Qaran ee Qandaraasyada Iibka Hubka, Rasaasta iyo Qalabka:**
   a. Dib-u-eegista miisaaniyadda iibka hubka, rasaasta iyo qalabka
   b. Diyaarinta iyo keydinta dukumentiyada qandaraaska
   c. Dejinta shuruudaha xulashada
   d. Diyaarinta dalabka iibka.
   e. Qabashada iyo qiimeynta dalabyada tartamayaasha
   f. Samaynta xulasho hordhac ah
   g. Gorgortanka Heshiiska qandaraaska
   h. Dejinta shuruudaha lacag bixinta
   i. Bixinta qandaraaska/yada
   j. Maareynta heshiiska qandaraaska

k. Burinta heshiiska qandaraaska
l. Diyaarinta iyo u gudbinta Wasaaradda Gaashaandhigga warbixino joogto ah.

Marka guddiga farsamo uu dhameeyo howsha qiimeynta iyo xulashada horudhaca ah ee qandaraaslayaasha, soona gudbiyaan warbixintooda, wasaaradda gaashaandhigga ayaa bixineysa qandaraaska isla markaana go'aan ka gaareysa cidda la siinayo, iyada ayaana la galeyso heshiiska iibka. Sidoo kale, hadii ay wax ka soo laabtaan oo cidda qandaraaska la siiyay ka soo bixi weyso heshiiski ay gashay wasaaradda gaashaandhigga ayaa masuul ka ah la xisaabtanka awoodna u leh ka bixista iyo burinta heshiiska iyada oo la tashaneysa hay'adda iibka loo sameynayay.

## Hawlaha La Qabanayo Iibka Ka Dib

1. **Isku-dubbaridka Shixnadaha:** Waaxda Iibka Wasaaradda Gaashaandhigga waxay la xiriiraysaa qandaraaslaha/yaasha guulaystay si uu u bilowdo keenista hubka, rasaasta iyo qalabka. Qandaraaslaha wuxuu bixinayaa tafaasiisha lagama maarmaanka ah, sida waqtiga uu dalabka ku imanayo iyo noocaa gaadiid ee lagu keenayo.

2. **Waqtiga Keenidda:** Waqtiga keenidda shixnadda la dalbaday iyo dhammaystirka dhammaan adeegyada wehliya (sida rakibaadda iyo howlgelinta agabka iyo tababaridda hawl-wadeenada ku shaqaynaya agabka) waa in si faahfaahsan loogu caddeeyaa qandaraaska iyadoo ay wehliyaan taariikho cayiman.

   Weedhaha "sida ugu dhaqsaha badan" "si deg-deg ah" "keydka ku jira" "agab diyaarsan" waa inaan la isticmaalin marka la tilmaamayo waqtiga keenista adeegga.

   Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa ku wargelinaysa Ra'iisul Wasaaraha iyo Madaxweynaha todobo cisho (7) ka hor inta aan la keenin dalabka hubka iyo rasaasta. Sidookale, Wasaaraddu waxay ogaysiinaysaa hay'adda dawladda ay khusayso.

3. **Gudoomidda, Kormeerka iyo Hubinta:** Marka ay shixnaddu soo gaarto goobtii loogu talagalay, waxaa isla guddoomaya Waaxda Iibka Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Hoggaanka Hubka iyo Rasaasta CQS. Hoggaanka Hubka iyo Rasaasta ayaa kormeer ku samaynaya hubka, rasaasta iyo qalabka la keenay si loo hubiyo nooca, tirada, tayada, iyo waafaqsanaanta shuruudaha la cayimay ee lagu qeexay qandaraaska iibka. Haddii ay dhacdo in dalabka la keenay uu iin ama cilad yeesho, ama uusan waafaqsanayn shuruudihii lagu heshiiyay waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loo ogaysiiyaa qandaraaslaha waana in si dhaqso leh dib loogu celiyaa. Hoggaanka Hubka iyo Rasaasta CQS waa in uu soo saaraa warbixin uu ku fasaxayo daabulidda iyo adeegsiga shixnadda hubka iyo rasaasta la guddoomay.

4. **Keydinta iyo Diiwaangelinta:** Hubka, rasaasta iyo qalabka la guddoomay waxaa la geynayaa bakhaarka keydka hubka iyo rasaasta CQS ama goobtii kale ee loogu talagalay iyadoo wixii diiwaangelin iyo summadeyn ah loo sameynayo. Hub, rasaas iyo qalab aan la diiwaangelin oo la summadeyn lama daabuli karo lamana adeegsan karo. Keydinta, diiwaangelinta iyo daabulidda hubka, rasaasta iyo qalabka waxaa loo marayaa Habraaca maamulka hubka, rasaasta iyo qalabka CQS ee ay meel mariyeen Golaha Wasiirada Abriil 2020.

5. **Sugidda Amniga Shixnadda:** Marka la eego xasaasiyadda dalabka yimid uu leeyahay, Wasaaradda Gaashaandhigga oo kaashanaysa hay'adaha aminga dalka ay khusayso, waxaa waajib ka saaranyahay in ay qaadaan tillaabooyin amni oo lagu xaqiijinayo ilaalinta xogta hubka iyo rasaasta yimid.

## Cutubka 4aad: Agaasinka Hay'adeed ee Fulinta Siyaasadda

### Mas'uuliyadaha

Mas'uuliyadaha hay'adaha kala duwan ee ku aadan libka hubka, rasaasta iyo qalabka waa sida ku xusan jaantuska hoose:

| Lr | Hay'adda | Mas'uuliyadda |
|---|---|---|
| 1 | Wasaaradda Gaashaandhigga | ✓ Wasaaradda Gaashaandhigga waxay mas'uul ka tahay dhammaan iibka hubka, rasaasta iyo qalabka ciidamada ee hay'adaha amniga ee heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed.<br>✓ Isku-duwidda iyo diyaarinta qorshaha hubka, rasaasta iyo qalabka hay'adaha amniga dalka.<br>✓ Isku xirka iyo isku-duwidda shaqada Guddiga Qaran ee Qandaraasyada.<br>✓ U hoggaansanaanta shuruucda qaran iyo xeerarka caalamiga ee qandaraas bixinta iyo xakamaynta hubka.<br>✓ Bixinta shahaadada adeegsadaha (EUC) iibka hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka. |
| 2 | Wasaaradda Amniga Gudaha | ✓ Qeexidda iyo qiimeynta baahida hub, rasaas iyo qalabaka ee Ciidanka Booliska iyo Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka.<br>✓ U gudbinta Wasaaradda Gaashaandhigga qorshaha hub, rasaas iyo qalab ee Ciidanka Booliska iyo Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka.<br>✓ La socodka hubka, rasaasta iyo qalabka Ciidanka Booliska iyo Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka. |
| 3 | Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka | ✓ Qeexidda iyo qiimeynta baahida hub, rasaas iyo qalab ee Ciidanka Asluubta.<br>✓ U gudbinta Wasaaradda Gaashaandhigga qorshaha hub, rasaas iyo qalab ee Ciidanka Asluubta.<br>✓ La socodka hubka, rasaasta iyo qalabka ee Ciidanka Asluubta. |
| 4 | Dawlad Goboleedyada | ✓ Qeexidda iyo qiimeynta baahida hub, rasaas iyo qalab ee Ciidanka Booliska iyo Asluubta ee heer Dawlad Goboleed.<br>✓ U gudbinta Wasaaradaha Amniga iyo Cadaaladda ee heer Federaal baahida hub, rasaas iyo qalab. |

| | | |
|---|---|---|
| | | ✓ Lasocodka hubka, rasaasta iyo qalabka Ciidanka Booliska iyo Asluubta ee heer Dawlad Goboleed.<br>✓ U hoggaansanaanta nidaamka federaalka iyo shuruucda kale dalka u degsan. |
| 5 | Wasaaradda Maaliyadda | ✓ Haddii qandaraaska laga maalgelinayo Miisaaniyadda Qaranka, waa in kahor inta aan la bilaabin habraaca xulashada ee qandaraaska laga helaa Wasaaradda Maaliyadda oggolaansho tilmaamaya in Dawladdu ka bixi karto kharashka ku baxaya qandaraaska.<br>✓ Haddi qandaraaska iibka uu yahay mid lagu maalgelinaayo lacag deyn ah ama qalabka lagu soo qaadanaayo dayn, waa in Wasaaradda Maaliyaddu, si waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, kasoo gorgortantaa, soona saxiixdaa heshiisyo gaar ah oo la tacaalaaya bixinta daymahaas iyo shuruudaha lagu bixinaayo. Lama saxiixi karo heshiis lagu maalgelinaayo lacag deyn ah ama lagu soo qaadanaayo qalab dayn ah iyada oo aan Wasaaradda Maaliyadda laga helin oggolaansho cad.<br>✓ Hadii hubka, Rasaasta ama qalabka ciidan lagu qaadanayo qaab deyn ah, waa in ogolaasho laga helaa wasaaradda maaliyadda, ka dibna ay wasaaradda maaliyaddu la gashaa cidda hubka, rasaasta ama qalabka ciidan laga gadanaayo heshiis u gaar ah hannaanka lacag bixinta oo ku lifaaqan isla markaana dhameystiraya heshiiska Deynta ee wasaaradda gaashaandhiggu galayso. Lama saxiixi karo qandaraas u baahan dammaanad maaliyadeed oo Dowladdu galayso iyada oo aan Wasaaradda Maaliyadda laga helin oggolaansho cad |

## Xogaha Hubka, Rasaasta iyo Qalabka

Ma jirto cid xaq u leh in ay baahiso xog la xiriirta hubka, rasaasta iyo qalabka ee hay'adaha amniga dalka. Xogta waxaa loo maareynayaa si waafaqsan shuruucda dalka u degsan.

## Warshadeynta iyo Dhoofinta Hubka, Rasaasta iyo Qalabka Ciidan

Wasaaradda Gaashaandhigga JFS waxay yeelan kartaa mashaariic wax soo saar oo la xiriira hubka, rasaasta iyo qalabka ciidan. Waxa ayna soo saareysaa habraacyo u gaar ah wax soo saarka, adeegsiga iyo iibgeynta.

## Dib-u-eegista Siyaasadda Iibka Hubka iyo Rasaasta

Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa dib u eegis ku sameyneysa siyaasaddan hadii loo baahdo, waxaana

dib loo keenayaa Golaha Wasiirada oo meelmarin doono.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 162** **Taariikh: 19/07/2024**

**XEER: QARAARKA MAMNUUCIDDA KA GANACSIGA HUBKA IYO SAANADDA CIIDANKA.**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
24 JUL 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad faqradaha (a), (b) iyo (e), Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka JFS iyo Qod 126aad ee Dastuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu arkay:** Xeer Lr. 21 ee 26/08/1963 ee la xiriira Nabadgelyada Guud; iyo Xeer Madaxweyne ee lagu dhisay Laanta La-socodka Hubka iyo Rasaasta ee Xeer Lr. 142 ee Tr. 08/10/2023;

**Markuu arkay:** Soojeedinta Wasaaradda Amniga Gudaha ee JFS;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.24.81.07.24** ee **19/07/2024**, kuna saabsan Qaraarka **Mamnuucidda ka Ganacsiga Hubka iyo Saanadda Ciidanka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu garowsaday:** Baahida loo qabo in la xoojiyo hannaanka maarreynta hubka iyo rasaasta iyada oo la xaqiijinayo Amniga Qaranka iyo u hoggaansanaanta halbeegyada caalamiga ah ee la xariira maareynta hubka iyo rasaasta;

**Waxa uu meelmariyay:**

**Qodobka 1aad**
**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.24.81.07.24** ee **19/07/2024**, kuna saabsan Qaraarka **Mamnuucidda ka Ganacsiga Hubka iyo Saanadda Ciidanka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad
## Mamnuucidda Ka Ganacsiga Hubka iyo Saanadda Ciidan

Waxaa la mamnuucay ka ganacsiga dhammaan noocyada kala duwan ee hubka iyo saanadda ciidan ee soo gelaya ama ka baxaya gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 3aad
## Reebista Falalka Sharci-darrada ah

Waxaa reebban in la soo dejiyo, la dhoofiyo, la warshadeeyo, laga ganacsado, la isu gudbiyo, ama la daabulo hubka iyo saanadda ciidan.

## Qodobka 4aad
## Reebista Howlaha Dalaalnimada ee Hubka iyo Saanadda Ciidan

Waxaa la mamnuucay howlaha dallaalnimo oo la xiriira hub ama saanad ciidan oo laga fuliyo gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 5aad
## Heysashada Hubka iyo Saanadda Ciidan

Waxaa la oggol yahay haysashada hubka fudud sida Bistooladaha, AK47 iyo Qoryaha lamidka ah oo Cabirkoodu yahay 7.62mm (Calibre) ee ka diiwaangashan Wasaaradaha Amniga Gudaha ee labada heer dowladeed.

## Qodobka 6aad
## Tallaabooyin Sharci

1. Cid kasta oo jebisa qodobbada Qaraarka iyo shuruucda Dalka ee ku saabsan xakameynta hubka iyo saanadda ciidan waxaa laga qaadayaa tallaabo waafaqsan shuruucda Dalka, waxaana si sharciga waafaqsan lagula wareegayaa gaadiidka, hubka, iyo saanadda ciidan ee sharci-darrada ah.
2. Waxaa dabagal iyo xannibaad lagu soo rogayaa cid kasta oo lagu helo falalka sharci-darrada ah ee lagu mamnuucay Qaraarkan si waafaqsan shuruucda Dalka.

**Qodobka 7aad**

**Hirgelinta Qaraarka**

1. Wasaaradaha Amniga Gudaha ee labada heer dowladeed iyo hay'adahooda amniga gudaha waxaa la farayaa in ay fuliyaan Qaraarka iyo shuruucda Dalka ee khuseysa xakameynta hubka iyo saanadda ciidan.
2. Wasaaradaha Amniga Gudaha waxaa la farayaa inay si dhow ula shaqeyso Laanta La-socodka Hubka iyo Rasaasta ee Xafiiska Amniga Qaranka si ay warbixin joogta ah usiiso Golaha Amniga Qaranka.

**Qodobka 8aad**

**Dhaqangalka Qaraarka**

Qaraarkan waxa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA ★ XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA ★ FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA ★ OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-464-2024
TAARIIKH : 29/08/2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA AMNIGA GUDAHA
XAFIISKA WASIIRU DOWLAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الأمن الداخلي
مكتب وزير الدولة

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
Ministry of Internal Security
Office of the State Minister

**Ref.WAG/XWD/364/24** **Tr: 18/07/2024**

KU : RA'IISUL WASAARAHA XFS =MUQDISHU=

UJEEDDO : QARAARKA MAMNUUCIDA KA GANACSIGA HUBKA IYO SAANADDA CIIDAN EE ( CIR TOOGTE )

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**

Wasaaradda Amniga Gudaha waxa ay halkaan si xushmad iyo qadarin ku dheehan tahay kugu soo gudbineysaa **QARAARKA LAGU MAMNUUCAYO KA GANACSIGA HUBKA IYO SAANADDA CIIDAN EE ( CIR TOOGTE )**

Mudane Ra'iisul Wasaare Qaraarkaan oo baahi weyn loo qabo, Waxaan markale kaa codsaneynaa in **QARAARKA LAGU MAMNUUCAYO KA GANACSIGA HUBKA IYO SAANADDA CIIDAN EE ( CIR TOOGTE )** aad u gudbiso Golaha Wasiiradda Xukuumada Fadaraalka Soomaaliya ee Dan Qaran si ay u meel mariyaan Qaraarkaan.

Sidaas awgeed, Mudane Ra'iisul Wasaare waxaan kaa rajeyneynaa codsiga sare ku xusan in aad naga aqbali doonto.

**Mahadsanid,**

**Eeg Lifaaqa Qaraarkan.**

XUKUUMADA FEDERAALKA SOOMAALIYA WASAARADDA AMNIGA GUDAHA XAFIISKA W. DOWLAHA OFFICE OF THE STATE MINISTER وزارة الأمن الداخلي MINISTRY OF INTERNAL SECURITY

**Xil. Maxamed Cali Xagaa**
**K/S Wasiirka ahna**
**Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.**

Tixraac:XRW/308/07/2024 Tariikh: 02/07/2024

## QARAAR: QARAARKA AQOONSIGA KHATARAHA AMNIGA QARANKA

**Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda JFS:**

**Markuu arkay:** Qodobka $97^{aad}$ faqradda $1^{aad}$ iyo $2^{aad}$; Qodobka $99^{aad}$ faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (g); iyo Qodobka $100^{aad}$ faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG ah;

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **WAGXW/313/24** ee ku taariikheysan **04/06/2024** ee Wasaaradda Amniga Gudaha kuna saabsan codsi soojeedinta Aqoonsiga Khataraha Amniga Qaranka;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay **SHGW.21.78.06.24** ee **27/6/2024,** kuna saabsan ansixinta **Qaraarka Aqoonsiga Khataraha Amniga Qaranka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Baahida loo qabo in Khataraha Amniga Qaranka lagu wajaho go'aan wadajir ah iyada oo xilgudashada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya loo jiheynayo sidii looga hortagi lahaa khatarahaasi;

**Waxa uu Meelmariyay:**

**Qodobka $1^{aad}$**

**Go'aan Gole**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
31 JUL 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirada ee summaddiisu tahay **SHGW.21.78.06.24** ee **27/6/2024,** kuna saabsan ansixinta **Qaraarka Aqoonsiga Khataraha Amniga Qaranka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

## Qodobka 2aad

## Aqoonsiga Khataraha Amniga Qaranka

1. Arrimaha soo socda waxaa loo aqoonsaday Khataraha Amniga Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:

    a) Argagixisada;

    b) Aragtida Gooni-goosadka;

    c) Dowlad-nugeylka:

        i. Daahfurnaan la'aanta & musuqa;

        ii. Adeegga dadweynaha oo liita;

        iii. Isku-filnaansho la'aanta xagga amniga & difaaca;

        iv. Kobac-yarida dhaqaalaha;

        v. Xaaladda xuquuqda aadanaha & sarreynta sharciga;

        vi. Baahsanaanta hubka ku jira gacanta dadweynaha.

    d) Xuduudaha Beylahda;

    e) Isbeddelka Cimilada;

    f) Khataraha Bulshada:

        i. Heybguurka (Afka Soomaaliga, dhaqanka & fanka, iyo sooyaalka qoran);

        ii. Qabyaaladda & dagaallada beeleysan;

        iii. Fikir-diimeedka xagjirka ah;

        iv. Jahliga & aqoonxumida;

        v. Maandooriyaha;

        vi. Saboolnimada.

2. Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxaa la farayaa in ay xilgudashadooda ku jiheeyaan sidii wax looga qaban lahaa khataraha lagu aqoonsaday faqradda kowaad ee qodobkaan.

## Qodobka 3aad
## Dejinta Istiraatiijiyadda Amniga Qaranka

1. Xafiiska Amniga Qaranka, isaga oo raacaya jiheynta iyo tilmaamaha Madaxweynaha, waxaa la farayaa in ay si degdeg ah uga howlgalaan diyaarinta Istiraatiijiyadda Amniga Qaranka ee lagu wajahayo Khataraha Amniga Qaranka iyaga oo la kaashanaya Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee ay khuseyso.

2. Dhammaan siyaasadaha iyo shuruucda ay dejinayaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Xukuumadda waa in ay ka jawaabayaan Khataraha Amniga Qaranka ee halkaan lagu aqoonsaday si waafaqsan Istiraatiijiyadda Amniga Qaranka iyada oo Xafiiska Ra'iisul-wasaaruhu uu ku korjoogteynayo Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 4aad
## Dhaqangalka

Qaraarkan waxa uu dhaqangalayaa marka ay ansixiyaan Golaha Wasiirrada uuna saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

**LIFAAQ:**

**QIIMEYNTA KHATARAHA AMNIGA QARANKA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA ★ XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA ★ OFFICE OF THE PRIME MINISTER ★ FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-461-2024
TAARIIKH: 29-08-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA AMNIGA GUDAHA
XAFIISKA WASIIRU DOWLAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الأمن الداخلي
مكتب وزير الدولة

**FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA**
**Ministry of Internal Security**
**Office of the State Minister**

**Ref.WAG/XWD/313/24** **Tr: 04/06/2024**

**Ku : Ra'iisul Wasaaraha XFS** **=Muqdishu=**

**Og : Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha** **=Muqdishu=**

**Ujeeddo: Codsi Gudbin Siyaasadda Qiimeynta Khataraha Amniga Soomaaliya.**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**

Wasaaradda Amniga Gudaha Waxa ay halkaan si xushmada iyo qadarin ku dheehan tahay kugu soo gudbineysaa Siyaasadda Qiimeynta Khataraha Amniga Soomaaliya, Mudane Ra'iisul Wasaare siyaasadaan oo baahi weyn loo qabo, Waxaan markale Mudane Ra'iisul Wasaare kaa codsaneynaa in siyaasadaan aad u gudbiso Golaha Wasiiradda Xukuumada Fedaraalka Soomaaliya ee Dan Qaran si ay u meel mariyaan Siyaasadda Qiimeynta Khataraha Amniga Soomaaliya kadibna uu gudbo Golaha Shacabka Baarlamaanka Fadaraalka Soomaaliya.

Sidaas awgeed, Mudane Ra'iisul Wasaare waxaan kaa rajeyneynaa codsiga sare ku xusan in aad iga aqbali doontid

**Wada Shaqeyn Wacan,**

**Eeg Lifaaqa hoose ee Siyaasadda.**

**Xil. Maxamed Cali Xagaa**
**Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.**

# Qiimeynta Khataraha Amniga Qaranka



Xafiiska Amniga @aranka JFS

JUNE. 2024

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**XAFIISKA AMNIGA QARANKA**

# QIIMEYNTA KHATARAHA AMNIGA QARANKA

(WARBIXIN KOOBAN}

**MOGADISHO**
**JUNE. 2024**

## Gogoldhig

24 sano ka dib marki dib loo soo yab-yabay dowladnimada Soomaaliya, waxaa aragti istiraatiijiyadeed u ah DFS ee uu hoggaamiyo **Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud** in laga gudbo aragtidi xaaladda deg degga aheyd ee sida ku-meelgaarka ah ay ugu shaqeyn jirtay Dowladda Soomaaliyeed. Waxaa si dhammeystiran looga guurayaa cinwaanki howsha Qaran ee ay Dowladdu Dalka ka haysay oo ahaa "Amni & Difaac", waxaana loo guurayaa aragti cusub oo ku saleysan "Amni Qaran".

Qaranka Soomaaliyeed waxa uu wajahayaa khataro waaweyn oo halis galinaya jiritaanka dowladdnimada, midnimada Dalka iyo wadajirka dadka Soomaaliyeed. Khatarta **argagixisada** ayaa ah tan ugu weyn ee xilligaan Qaranka Soomaaliyeed wajahaayo, waxa ayna si toos ah halis u galineysaa nabadda iyo badqabka muwaadiniinta, dowladnimada iyo gobannimada Qaran ee Soomaaliya oo xilliga la joogo magan u ah cutubka 7aad ee axdiga Qaramada Midoobay.

Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa waxay u asteysay in siddeeda tiir ee hoos ku xusan ay yihiin khataraha ugu waaweyn ee ay maanta wajahayaan dowladdnimada, midnimada Dalka iyo wadajirka dadka Soomaaliyeed.

## Argagixisada

Shan iyo tobanki sano ee u dambeeyay Soomaaliya waxa ay wajaheysay argagixiso caalami ah oo khatar weyn galisay jiritaanka qarannimada Soomaaliyeed ka dib marki ay dhibaato weyn u geysteen nafta, maalka, sharafka iyo dowladnimada shacabka Soomaaliyeed.

Ma jirto dood weyn oo ka taagan in Al-Shabaab ay tahay khatarta ugu weyn ee haysata amniga Qaranka Soomaaliyeed xilligaan. Difaac ahaan, Al-Shabaab waa khatar ciidan oo weyn oo si toos ah u dhaawacday gobannimadi Qaranka soomaliyeed iyo madaxbannaanidi DFS u laheyd si ay u maamusho dhammaan Dalka iyo dadka ay masuulka ka tahay.

Daacish oo ah ururuka argagixiso ee ugu khatarta badan dunida waqtigan la joogo ayaa isna ku guuleystay in uu gudaha Soomaaliya ku abuuro koox argagixisa caalami ah oo Daacish ku matasha Soomaaliya. Kooxdan oo asal ahaan ku abuurantay fallaago ka baxday Al-Shabaab ayaan xilligaan la joogo khatar weyn oo muuqata ku aheyn amniga guud ee Dalka, sababo la xariira koobnaanta xubnaha kooxda, iyo Al-Shabaab oo qeyb ahaan u suuragashay in ay fashiliso kobaca Daacishta Soomaaliya.

Xafiiska Amniga Qaranka JFS

Balse khatarta Daacishta Soomaaliya ayaa ah in ay u sharaxan tahay in ay dhaxasho Al-Shabaabka hadii si dhameystiran loogu jabiyo dagaalka xilligan ku socda ee wajigiisi kowaad guulaha waaweyn laga gaaray; iyo in kooxdu tahay wakiil dhaafsan Soomaaliya oo u darban in uu Daacishta caalamiga ah ku soo hoggaamiyo Bariga Afrika oo dhan.

## Isku dayada gooni u-goosadka

Gooni isu-taag-doonka Somaliland ee la facjirsaday burrbuka dowladnimada Soomaaliya waxa uu si toos ah u kala dhantaalayaa midnimada dhuleed ee JFS, waxaana abuurmay dhul baaxaddiisu tahay "176,119.2sqkm" oo ka baxsan gacanta DFS oo ah nidaamka dastuuriga ah ee u taagan matalaadda JFS. Arrintaan oo ka dhigan in gobannimadi JFS uu soo gaaray dhaawac weyn, maadaama 27.62% dulka JFS uu noqonayo mid aanan hoos joogin gobannimada Soomaaliya si buuxda oo aysan ka hirgaleynin shuruucda Dalka u yaalo, Dowladda Soomaaliyana aysan dammaanad qaadi karin wax walba oo uga yimaado dhulka intaas la eg amniga gobalka iyo kan caalamkaba.

Waxa ay JFS ku weyneysaa gooni isu-taagga Somaliland qeybta ugu muhiimsan dhulkeeda marka la eego dhanka istiraatiijiyadda iyo geoplotics-ka. Ahmiyaḍda gaarka ah ee qeybta dhuleed ee ay ku fadhiso Somaliland ayaa ka dhalaneysa xeebta dheer ee ku dherersan Gacanka Berbara/Cadan oo ah mid ka mid ah marinnada ugu muhiimsan ee caalamaka, maadaama uu isku xiro Badweynta Hindiya iyo Khaliijka Carbeed oo dhinac ah iyo Badda Cas, waxaana si fudud looga xakameyn karaa dhadhaqaaqa surinka Baabal Mandab oo leh ahmiyad aan ka yareyn tan Kannaalka Suweys. Gooni isu-taag-doonka Somaliland waxa ay JFS qeyb ahaan ku weyneysaa saameynta iyo miisaanki ay ku laheyd amniga Jasiirad-u-egta Carbeed iyo dowladaha khaliijka oo ah xilligaan ubucda tamarta aduunka gaar ahaan shidaalka. Sidoo kale waxa uu qaabka qariiradda JFS ka dhigayaa mid dhuuban oo ah qaabka ugu liita qariiradaha dhuleed ee dowladi yeelato marka la fiiriya dhanka difaaca iyo badqabka midnimada dhuleed.

## Dowlad-Nugeylka

Dowladnimada Soomaaliya waa mid nugul balse soo kabaneysa tan iyo marki dib loo unkay sanadii 2000. Nidaamka Dowladnimada Soomaaliya ayaa ah mid wali dadaal ugu jira sidi loo xaqiijin lahaa heerka hufnaanta maamul ee loo baahan yahay, adeeg dadweyne oo la aqbali karo, kobac dhaqaale oo loo qaateen ah, xaqiijinta xuquuqda aadanaha iyo sarreynta sharciga, xakameynta baahsanaanta hubka, rasaasta iyo xuduudaha Dalka, iyo amniga iyo difaaca, oo dhammaantood ah howlo si fudud looga dheehan karo heerka nugeylka dowladnimada Soomaaliya.

Xafiiska Amniga Qaranka JFS

Dagaalka dhabta ee DFS sugaya ayaa ah wax ka qabashada khataraha waaweyn ee ku raran dowlad-nugeylka ragaadiyay Soomaaliya tan iyo marki ay xornimada qaadatay. Waxaa lama huraan ah in dib u qaabeyn ballaaran lagu sameeyo fahamka iyo ficilka Dowladda Soomaaliyeed, iyada oo saldhig looga dhigayo aragtiyo siyaasadeed oo aasaas sax ah u dhigaya dowlad-wanaag ku suntan sarreynta iyo talinta sharciga, hufnaan, daahfurnaan iyo dhowrista xuquuqda aadanaha ee ay dhowreen Dastuurka, shuruucda Dalka, baaqyada iyo heshiisyada caalamiga ah. Waxaa dib u habeyn, ballaarin iyo horumarin deg deg ah u baahan hay'adaha amniga iyo garsoorka Dalka oo ay tahay in si dhab ah loo hubiyo in waxa ay ka shaqeynayaan ay tahay danta Qaranka oo kaliya si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee Dalka u taal.

Waxaa jirta baahi loo qabo hirgalinta hannaan siyaasadeed ku saleysan doonista dadka Soomaaliyeed iyo doorashooyin xor ah oo qof iyo cod ah. Waxaa in la dhagax dhigo u baahan nidaam dhaqaale qaran oo ay ku wada manaafacsadaan dadka Soomaaliyeed si siman. Si guud, waxaa lama huraan ah in leysku howlo in DFS iyo dowladaha xubnaha ka ah ay yeeshaan hay'ado dowladeed oo taabagal ah kuna filan in adeegyo hufan oo loo siman yahay ay siiyaan muwaadiniinta Soomaaliyeed. Waxaa isbeddel weyn u baahan in lagu sameeyo dhaqaalaha Dalka iyada oo kor loo qaadayo dakhliga Dowladda si loo abuuro awood dhaqaale oo isbeddel dhab ah lagu sameyn karo. Waxaa u baahan in si weyn loo xakameeyo hubka iyada oo la dhaqan galinaayo shuruucda iyo go'aamada khuseeya.

## Xuduudaha Beylahda ah

Qarannimada waxaa saldhig u ah dhul xaddidan, xuduudo la yaqaanno oo xakameysan leh. Mid ka mid ah khataraha ugu waaweyn ee haysta amniga Qaranka Soomaaliyeed ayaa ah in xuduudaha JFS ee badda, barriga, hawada iyo cyperspace-ka aysan jirin cid la socota, xakameysa isla markaana difaacda, marka laga reebo hawada JFS oo ay DFS la soo noqotay "la socodkeeda" kaliya balse aysan jirin awood dowladeed oo lagu xakameeyo laguna difaaco.

Xuduudaha JFS ee beylahada ah waa arrinta kowaad ee sababta u ah in JFS ay lumiso qeyb ahaan gobannimadeedi; Waa sababta kowaad ee saldhigga u ah in golaha ammaanka ee UN-ku u aqoonsado xaaladda Soomaaliya mid khatar ku ah amniga caalamaka iyo kan gobolkaba, sidaa darteena ay masuuliyad caalami ah tahay faragalintiis iyo jiheynta dowlad dhiskiisa, waana sababata tan iyo 1992-di ay Soomaaliya ugu hoos jirto cutubka 7aad ee lagu dhaqo dalalka xaaladdoodu ay khatarta ku tahay amniga caalamka.

Xafiiska Amniga Qaranka JFS

Soomaaliya waxa ay xuduud-dhuleed la leedahay dalalka: Ethopia (1,640 km), Kenya (684 km) iyo Djibouti (61 km); Sidoo kale Soomaaliya waxa ay leedahay xeeb ku teedsan Badweynta Hindiya & Gacanka Berbera/Cadan oo dhererkeedu yahay (3,025 km). dhammaan xuduudaha la soo xusay oo isugeyntoodu tahay (5,410 km) waa beylah aysan DFS tabar u yeelan in ay la socoto si dhamaystiran, xakameyso ayna difaacato, marka laga reebo dadaallo kooban oo deegaannada qaar ay ka sameeyeen la socodka xeebaha ku aaddan.

## Isbeddelka Cimilada:

Cimilada dalka Soomaaliya iyo inta badan kheyraadka dabiiciga oo ah arrimo isku xiran ayaa waxa ay wajahayaan isla markaana ka soo fool leh khataro waaweyn oo si toos ah u taabanaayo amniga Qaranka Soomaaliyeed.

Abaaraha, daadadka iyo khataraha ay xambaarsanyihiin ee isugu jira cunta yarida, biyo la'aanta, cudurrada faafa, nafaqa yarida iyo raadadka xanuunka badan ee ay ku reebaan nolasha iyo badqabka aadanaha waxa ay ka khatar badan yihiin argagixisada iyo dhibaatada ay dadka Soomaaliyeed ku hayso; Sidaa darteed, DFS waa in ay ka howlgashaa xakameynta khataraha ku daaban isbeddelka cimilada ee ku dul habsaday dunida oo dhan. Xaalufinta dhirta iyo daryeel la'aanta deegaanka ayaa ka mid ah khataraha waaweyn oo xoojinaya culeyska isbeddelka guud ee cimilada dunida ku socda.

## Faragelinta Shisheeye

Soomaaliya waxa ay astaan u noqotay dalalka sida weyn ula kulma faragalinta ka imaaneysa dibadda, arrintaas oo waqti dheer sabab iyo udub dhexaad u aheyd fashilki dowladnimada, dhicisteedi, burburkeedi iyo cuuryaaminta dib u soo kabashadeeda. Laga soo billaabo 1978 waxaa Dalka Soomaaliya ka abuurmay jabhado qabiilo hubeysan oo laga soo abaabulay dibadda Dalka, kaalmo toos ah iyo gabbaadsiinna ka helaayay dowlado shisheeye, jabhadahaas oo saldhig u noqday fashilki dowldnimada Soomaaliya ku yimid dhammaadki sedeetameeyadi qarnigi tagay iyo dhicitaankeedi 1991 iyo burburki ku yimid wixi intaa ka dambeeyay.

Shisheeyaha daneeya Soomaaliya ayaa xaqiijinta ajandayaashooda u mara faragelin diimeed oo siyaasadeysan, curyaaminta dib u dhiska dowladnimada Soomaaliyeed, xaalufinta kheyraadka dabiiciga ee gayiga Soomaaliyeed iyo is hortaagga horumarka kobaca iyo kaabayaasha dhaqaale iyada oo laga hortagaayo tartan ka yimaada dhinaca dhaqaalaha. Qodobadaan iyo kuwa kale oo badan oo faragelinta shisheeya ay si dadban iyo si toos ahba u sameeyaan ayaa ku ah khatar amni qaran jiritaanka dowladnimada iyo dowlad wanaaga Soomaaliya.

Xafiiska Amniga Qaranka JFS

## Khataraha Bulsho

Waa khataro istiraatiiji ah oo hadii aan wax laga qaban mustaqbalka si weyn u dhaawacaya jiritaanka Qaranka Soomaaliyeed. Xilligaan waxaa ugu waaweyn: haybguurka afka Soomaaliga, dhaqanka & fanka iyo sooyaalka qoranka; qabyaaladda & dagaallada sokeeye; fikir diimeedka xagjirka ah; jahliga iyo aqoonxumida, maandooriyaha iyo saboolnimada.

Khatarahaan bulsho ee uu la nool yahay Qaranka Soomaaliyeed ma ahan kuwa sahlan. Shacbka Soomaaliyeed waxaa ku socdo heybguur culus, waxaa sii aasmaya afki Soomaaliga, dhaqanki iyo fanki astaanta u ahaa shacabka Soomaaliyeed. Khatarta weyn ee arrintan heybguurka ah ku jirta ayaa ah in shacabku luminayo mid ka mid ah tiirarka midnimadiisa iyo wadajirkiisa ugu muhiimsanaa oo ah heybta Soomaalinimada. Sidoo kale, khataraha qabyaaladda & dagaallada sokeeye, fikirka xagjirka ah, jahliga iyo aqoon xumida iyo maandooriyah ayaa iyaguna ah khataro bulsho oo ay lama huraan tahay in Dowladda ay la timaado qorshayaal looga hortagaayo si looga gudbo.

## Marin Habaabinta Warbaahinta & Xogaha Been Abuurka ah:

Colaado badan oo dhex yaalla umadda Soomaaliyeed iyo khataro bulsho oo aad u fara badan oo haysta shacabka Soomaaliyeed waxaa saldhig u ah marin habaabin xooggan oo lagu sameynayo bulshada Soomaaliyeed iyada oo la adeegsanayo qeybaha kala duwan ee warbaahinta gaar ahaan baraha bulshada ee internetka, waxaana sameynaya dad caadeystay been abuuridda xogaha iyo baahinta wararka aan sal iyo raadka laheyn ee laga leeyahay ujeedooyin kala duwan oo ay ka mid yihiin kicinta dadweynaha, iska horkeenka beelaha iyo kala fogeynta qeybaha kala duwan ee bulshada. Waxaa caadi noqotay caayda iyo aflagaadeynta nasabka iyo qabaa'ilka iyo marinhabaabinta dadka Soomaaliyeed iyada oo lagu qancinaayo in beela kale ay si beelnimo ah u colaadinaayaan duullaanna ugu yihiin.

Marin habaabin diimeedka ku saleysan faafinta xogaha iyo fatwooyinka aan saxda aheyn, iyo ka been sheegidda Diinta iyo culimda, ayaa iyadana ah nooc been abuur iyo marin habaabin aad u khatar badan oo uu ku bulaalo fikir diimeedka xagjirka ah laguna huriyo colaadaha diimeed iyo is naceybka u dhexeeya wadaaddada Soomaaliyeed, Dalkuna waxa uu ku sugan yahay xaalad uu qarka u saaran yahay in ay ka qarxaan colaado diimeed oo ay u muuqato in ay soo lamaaneyn doonaan colaadihi beelaha u dhexeeyay ee loo tabar la'aa.

Xafiiska Amniga Qaranka JFS

Guud ahaan, khatarta marin habaabinta iyo xogaha been abuurka ah ayaa ah mid u baahan aragti qaran oo looga hortagaaya inta aysan galaafan midnimada, wadajirka iyo wadasocodka bulshada Soomaaliyeed.

**Dhammaad**

Xafiiska Amniga Qaranka JFS

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac:XRW/ 312 /08/2024 Taariikh: 04/08/2024

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA BIXID 05 AUG 2024 EXIT OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Ku: Xarunta Tubsan ee XRW =Muqdisho=
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada =Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**UJEEDDO: GO'AAN GOLE EE ANSIXINTA "ISTIRAATIIJIYADDA QARAN EE KA-HORTAGGA IYO LADAGAALLANKA FIKIRKA XAGJIRKA AH EE RABSHADAHA WATA"**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (F) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.26.83.08.24** ee **01/08/2024,** kuna saabsan **"Istiraatiijiyadda Qaran ee Ka-hortagga iyo Ladagaallanka Fikirka Xagjirka ah ee Rabshadaha Wata"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgaliyay:** Muhiimadda Istaraatiijiyadan Qaran ay u leedahay ladagaallanka fikirka xagjirka ah ee rabshadaha wata.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**
**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW26.83.08.24** ee 23/05/2024, kuna saabsan ansixinta **"Istiraatiijiyadda Qaran ee Ka-hortagga iyo Ladagaallanka Fikirka Xagjirka ah ee Rabshadaha Wata""** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

**Hirgalin**

Waxaa Xarunta Tubsan ee XRW loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Istiraatiijiyadda Qaran ee sare ku xusan.

**Dhaqangal**

Istiraatiijiyadda Qaran waxa ay dhaqangalaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-462-2024
TAARIIKH : 29-08-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA

XARUNTA QARAN EE TUBSAN

# Istiraatiijayada Qaran ee Ka Hortagga iyo La Dagaallanka Fikirka Xagjirka ah ee Rabshadaha Wata.

2024-2027

﴿ ادع إلى سبيل ربك بالحكمة والموعظة الحسنة وجادلهم بالتي هي أحسن إن ربك هو أعلم بمن ضل عن سبيله وهو أعلم بالمهتدين ﴾

[ النحل: 125]

## MAHADNAQ

Dhammaan noocyada argagixisada iyo xagjirnimada rabshadaha wata ayaa khatar weyn ku ah Amniga Qaranka Soomaaliya, bad-qabkeeda, kalsoonida muwaadiniinta, dadka deegaanka, hufnaanta Hay'adaha, barwaaqada ganacsigeenna iyo dhaqaalaheenna.

Istaraatiijiyadan ayaa qeexaysa qaab-dhismeedka ay Dowladaha, bulshada rayidka ah, aqoonyahannada, ganacsiga gaarka ah iyo saaxiibada caalamku ay si wadajir ah uga wada shaqeyn doonaan si loo gaaro Himilada Soomaaliya oo ah mid amni ah, barwaaqo ah Xorna ka ah dhamaan kooxaha xagjirka ah ee rabshadaha wata.

Waxaan u mahadcelineynaa Dhamaan Daneeyayaasha kala duwan ee kala shaqeeyay Xarunta Qaran ka Hortagga iyo La Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabshadaha wata ee **Tubsan** si ay u horumariyaan Istaraatiijiyaddan iyo Qorshayaasheeda Waxqabad.

Hay'adaha ay khusayso Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabshadaha Wata ee dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada kuwaas oo aan bixinayn keliya taageero aan leexleexad lahayn, balse waxa ka sii muhiimsan oo la magacaabay Wakiilo ka kala socda dhamaan maamul Goboleedyada iyo Gobolka Banaadir , kuwaas oo qeyb weyn ka qaatay Dib u eegista Qorista Istaraatiijiyadda iyo Qorshayaasheeda.

Dowrka Machadka Yurub ee Nabadda oo taageero xoogan siiyay dib u eegista Istaraatiijiyada iyo wax ku biirinta saameynta leh kaas oo ka imaanaya shuraakada caalamiga ah, waxaan Dowlada Soomaaliya leenahay Mahadsanid (kudos!) iyadoo adeegsaneysa xarunta Qaran ee ka hortagga iyo La dagaalanka fikirka xagjirka ee Rabshadaha Wata.

Xarunta Qaran ee Tubsan waxay sidoo kale u mahadcelinaysaa khabiirada dib-u-eegista ku sameeyay Istaraatiijiyada Qaran iyo Qorshayaasheeda Waxqabad.

Dib-u-eegista istaraatiijiyaddan waxaa lagu maalgeliyay taageero deeqsinimo leh oo ka timid Midowga Yurub oo ay hirgelisay EIP iyo sidoo kale UNDP.

# FARIINTA MADAXWEYNAHA

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# FARIINTA RA'IISUL WASAARAHA

# XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# FARIINTA AGAASIMAHA XARUNTA QARAN EE TUBSAN

## KHARIIRADA SOOMAALIYA





**Aasaaska Bilowga Cusub, Shanta Tiir ee Istaraatiijiyadda Qaranka ee Ka Hortaga iyo La Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata**

# TABLE OF CONTENTS

........................................................................................................................ 1

[125 :النحل ] ........................................................................................................ 2

MAHADNAQ........................................................................................................ 3

Khariirada Soomaaliya ........................................................................................ 7

Erey Bixin........................................................................................................ 12

Hordhac .......................................................................................................... 13

Dulmarka Istaraatiijiyada .................................................................................. 14

Xarunta Qaran ee Tubsan.................................................................................. 16

Hiigsi............................................................................................................... 16

Himilo ............................................................................................................. 16

Kaalinta Xarunta Qaran ee Tubsan ..................................................................... 16

Mabaadi'da Hagaysa Istiraatiijiyadda ................................................................. 17

Xaaladda Dalka................................................................................................ 18

Welwelka Deegaanka ee Xilligan ........................................................................ 18

Cidda Ka Dambaysa Fikirka Xagjirka Rabshadaha Wata ...................................... 20

Caqabadaha P/CVE ee Hadda Jira ..................................................................... 21

Kartida iyo Waxa an Awoodno ........................................................................... 22

Guud Marka Istiraatijiadda Qaran ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata. ................................................................................ 23

Isbedelka Aragti ............................................................................................... 25

Hagidda Hannaanka Qaranka ee lagula Tacaalayo Fikirka Xagjirka ah ee Rabshadaha Wata (Shuruucda, Siyaasadaha, Istiraatijiyadaha iyo Qorsheyaasha)........................ 26

Shanta Tiir ee Istririitiijayada Qaran ................................................................... 28

Tiirka 1aad: Isku-dubbaridka iyo Iskaashiga ....................................................28

Tiirka 2aad: Ka Qeybgalka Bulshada ................................................................28

Tiirka 3aad: Istiraatiijiyada Qaranka ee Isku-xirka Xiriirka Warbaahinta ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata ..........................................29

Tiirka 4aad: Ka Laabashada, Ka-tanaasulidda, Dhaqancelinta iyo Dhexgalka....................29

Tiirka 5aad: Cilmi baarista iyo Qiimeynta Khataraha ..........................................30

TIIRKA 1-AAD: ISKU-DUBBARIDKA IYO ISKAASHIGA ........................................... 30

Ujeedada 1aad: Isku-xirka Hay'adaha Dowladda iyo Iskaashi Siyaasadeed....................30

Ujeedada 2aad: La Falgalka Daneeyayaasha Shaqo Wadaagga ah .............................31

Ujeedada 3aad: Isku-duwidda Deeqbixiyeyaasha ...................................................31

Tiirka 2aad: Ka Qeybgalka Bulshada ................................................................... 33

Ujeedada 1aad: Hoggaamiyeyaasha Diinta ..........................................................33

Ujeedada 2aad: La-falgalka iyo Kor u Qaadida Adkaysiga Dhallinyarada ....................33

Ujeedada 3aad: Wada-hadal, Ka-hortagga Khilaafaadka iyo Wada-jirka Bulshada...........33

Ujeeddada 4aad: Adeegsiga Waxbarashada si Looga Hortago Xag-Jirnimada Rabshadaha Wata ....34

Ujeedada 5aad: La-falgalka Hay'addaha Gaarka Loo Leeyahay .................................34

Ujeeddada 6aad: Awood-Siinta Haweenka ee Ka Hortagga Xag-Jirnimada Rabshadaha Wata.........34
Ujeedada 7aad: Kaalinta Odayaasha Dhaqanka.........35
Ujeedada 8aad: La-falgalka Shabakadaha Bulshada Rayidka Ah.........35
Ujeedada 9aad: Horumarinta Dhaqaalaha.........35
Ujeedada 10aad: Hawgelinta Madal-bulsheedka ka Hortagga Iyo La Dagaalanka Fikirka Xagjirka Ee Rabashadaha Wata.........36
Ujeedada 11aad: La-falgalka Qurba-Joogta Soomaaliyeed.........36
Ujeedada 12aad: Xasilinta Deegannada la Xoreeyay.........36
Ujeeddada 13aad: Hawl-gelinta Iskaashiga Ka Dhaxeeya Hay'adaha Amniga Iyo Bulshada.........37
Ujeedada 14aad: Ka Hortagga iyo Ilaalinta Dadka u Nugul Xagjirnimada Rabshadaha Wadata.........37
Ujeedada 15aad: Amni-darada Isbedelka Cimilada iyo Ka-hortagga Xag-jirnimada Rabshadaha Wadata.........37

**Tiirka 3aad: Istiraatiijiyada Qaranka ee Isku-xirka Xiriirka Warbaahinta ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata......... 38**
Ujeedada 1aad: Guddiga Isku-xirka Xiriirka Warbaahinta ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata.........38
Ujeedada 2aad: Ka Hortagga Dacaayadaha, War-xumada, iyo Tabinada Xagjirka.........38
Ujeedada 3aad: Kor u Qaadida Adeegyada Bulshada iyo Helitaanka.........39
Ujeedada 4aad: Sameynta Ole-oleyaal Lagu Toosiyo Bulshada.........39
Ujeedada 5aad: Dabagal Dhamaystiran iyo La Socodka Dhaqdhaqaaqyada Xagjirnimada.........40
Ujeedada 6aad: Ka Qaybgelinta Dhalinyarada iyadoo Loo Marayo Hindisaha Fanka, Dhaqanka iyo Ciyaaraha.........40
Ujeedada 7aad: Istiraatiijiyada Isku-xirka Wax ku oolka ah ee Xasaradaha ee La-dagaalanka Xagjirnimada iyo Argagaxisada.........40
Ujeeddada 8aad: Kor u Qaadista Codka Dhibanayaasha & Kuwa ka Badbaaday Argagaxisada.........41

**Tiirka 4aad: Ka Laabashada, Ka-tanaasulidda, Dhaqancelinta iyo Dhexgalka......... 42**
Ujeedada 1aad: La Socodka Isbeddellada Xogta Ku Saabsan kasoo laabtayaasha iyo Ka-tanaasulayaasha Fikirka Xagjirnimada.........42
Ujeedada 2aad: Xaqiijinta Baaritaano ku Saleysan Dhowrista Xuquuqda Aadanaha, Dacwad-oogidda, Dhaqancelinta iyo Kasoo Laabashada.........42
Ujeedada 3aad: Kor u Qaadida Ka Fogaanshaha Xagjirnimada Rabshadaha Wadata.........42
Ujeedada 4aad: Qaabeynta Dhaqancelinta Iyo Ka Faa'iideysiga Cafiska.........43
Ujeedada 5aad: Dib-u-heshiisiin ku Saleysan Bulshada.........43
Ujeeddada 6aad: Ilaalinta iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha.........43
Ujeedada 7aad: Xoojinta Sarreynta Sharciga iyo Hay'adaha Garsoorka ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata.........43
Ujeedada 8aad: Wax ka Qabashada Xagjirnimada Rabshadaha Wadata ee Xabsiyada iyo Xarumaha Dhaqancelinta.........44

**Tiirka 5aad: Cilmi Baaris iyo Qiimeynta Khataraha......... 45**
Ujeedada 1aad: Cilmi-baaris Casri.........45
Ujeedada 2: In la Aqoonsado Khatarta, Baahida, Nidaamka Digniinta Hore iyo Qiimaynta Khatarta 45
Ujeedada 3aad: Hal Abuurka iyo Teknolojiyada P /CVE.........46
Ujeedada 4aad: Kordhinta Qaab-dhismeedka Sharciga iyo Siyaasadda.........46
Ujeedada 5aad: Kormeerka Hawlgalka, Qiimeynta iyo Warbixinta.........46
Ujeedada 6aad: Kor u Qaadista Maamulka, Isla xisaabtanka iyo Dhisidda Heshiis Bulsho.........46
Ujeedada 7aad: Tababarka & Dhismaha Awoodda ee P/CVE.........47

**Hirgelinta Istaraatijiyadda Qaran ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata......... 48**

**Qaabdhismeedka Hirgelinta......... 49**
Dowladda Soomaaliya (hay'adaha federaalka, kuwa dowlad goboleedka iyo dowladaha hoose).........49
Bulshada Rayidka ah, Iskaashatooyinka aan Dowliga Ahayn iyo Kuwa Caalamiga ah.........50

Dowrka Xarunta Qaran ee Tubsan....51
Dowrka Wasaaradaha, Wakaaladaha, Agaasinnada, Waxaaha iyo Xafiisyada....52
Dowrka Hay'adaha Amniga....52
Dowrka Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Benaadir....52
Dowrka Maamulka Degaanka....53
Dowrka Bulshada....53
Dowrka Warbaahinta....54
Dowrka Hay'adaha aan Dowliga Ahayn....54
Dowrka saaxiibada  Caalamiga ah....55
Kormeerka, Qiimeynta & Warbixinta....55
Cabbir Sugan....56
Madal Hawleedka Isku-xirka Dadaalada P/CVE....56
Tubsan oo ah Xarunta ka Hortagta Xagjirnimada Rabshadaha Wadata....57

## EREY BIXIN

Qeexitaannada soo socda waxay naga caawin doonaan faham guud iyo caddayn sugan oo aynu ku qeexeyno ujeedada ka dambaysa Istaraatiijiyadda ka hortagga iyo la dagaallanka Fikirka Xagjirka ee Rabshadaha Wata iyo meel-marinta geeddi-socodkeeda.

**Fikirka Xagjirka ee Rabshadaha Wata**: Waxay dhawaan Qaramada Midoobay shaaca ka qaadday in "**Fikirka Xagjirka ee Rabshadaha Wata** waa dhacdooyin baahsan, oo aan lahayn qeexitaan sugan," laakiin waxaan ku muujinaynaa fahamka ku wejehan Fikirka Xagjirka ee Rabshadaha Wata inay dhab ahaantii ku salaysan yihiin rumayn iyo ficillo ay dadka taageeraan ama fikirkaas dhiirrigelinaya ay u adeegsadaan qaabab ay ka mid yihiin Bulsho, Dhaqaale, ama ujeedooyin Siyaasadeed.

**Ka Hortagga iyo La-dagaallanka Fikirka xagjirka ee rabshadaha wata,** sidaas awgeed, waxanu ku qeexnay sida hadafkeennu yahay: siyaasad iyo dhaqdhaqaaqyo hadafkoodu yahay in dadweynaha laga horjoogsado inay hawlahaas sameeyaan ama dhaqaale lagu taageero, si ay fikirkaas u dhiirrigeliyaan iyagoo adeegsanaya rabshado ka dhan ah dadweynaha, iyagoo cudur-daar ka dhiganaya inay fikir difaacayaan. Waxaa kaloo ka mid ah ficillo ka hor imaanaya farriimo lagula dagaallamayo iyo ficillo caqabado ku ah bulshada, sida adeegsiga Dacaayado iyo weerarro xagjirnnimo. Haddaba, waxaa tusaalooyinka Istaraatiijiyadda iyo qorsheheeda KA HORTAGGA IYO LA DAGAALANKA FIKIRKA XAGJIRKA EE RABASHADAHA WATA ku jira dadaallo lagu dhisayo wacyiga oo ay wadajir uga wada shaqeynayaan Dowladda iyo Hay'adaha aan Dowliga ahayn.

**Xagjirka:** Waxaa lagu qeexay ficil dambiyeedyo, ay ka mid yihiin. kuwa bulshada ka dhan ah, kuwa loo sameeyo in lagu gumaado dadka, ama dhaawacyo halis ah loogu geysto ama lagu af-duubto dad, taasoo looga gol-leeyahay in kicin xiisado argagax leh oo dadweynaha lagu abuuro, koox dad ah ama dadka gaar ah, lagu waxyeelaynayo dadweynaha, ama lagu khasbayo in dowladda ama hay'adaha caalamiga ah ay tallaabo qaadaan.

**Xag-jirnimo horseedda fikirka rabshadaha wata:** waa geeddi-socod uu qofku ku hawlan yahay kordhinta inuu aqbalo adeegsiga fal-dambiyeedyada, taasoo macneheedu ka mid yahay. xagjirnimada, isagoo isku dayaya inuu ku gaaro hadaf siyaasadeed/Fikir isaga u gaar ah.

## HORDHAC

Hadafka Istaraatiijiyadani, waa in si cad loo qeexo aragtida lagula dagaallamayo (marka uu ficilku dhacayo) iyo ka hortagga (ka hor inta uusan dhicin) falka argagixisannimo, Tani waxay ku salaysan tahay fahamka ugu wacan ee ka dhanka ah habka ugu yeerista/Qorista iyo kooxaha ka dambeeya falalka argagixisada, iyadoo sidoo kale la horumarinayo xirfadaha ugu habboon ee lagu taageerayo awoodaynta bulshada, si ay ugu noolaadaan nabadgelyo iyo dhaqdhaqaaq dhaqaale oo ay Soomaalidu jawi xasilooni leh ku gaaraan. Wuxuuna Dukumentigan inoo sahlayaa tusaalooyin wax-ku-ool ah oo aan ku xaqiijin karno aragtida la hiigsanayo, natiijooyinka iyo saamaynta ka dhalan karta, kuwaasoo ku xidhnaan doona dadaallo wadajir ah oo aan ku meel-marinayno ujeedooyinka Istaaratiiyadani ay leedahay.

Qoddobadda ugu muhiimsan ee ujeedooyinka istiraatiijiyadda waxa ka mid ah:

- Inay wax ka qabtaan kana hortaggaan sababaha asaasiga ee dhaliya xagjirnimada rabshadaha wata.
- In la abaabulo dhammaan dowladda iyo la-hawlgalayaasha kale.
- Xoojinta Cilmi-baarista.
- Awoodaynta Xirfadaha- Dhammaan gobolada, bulshada rayidka ah iyo Maamul goboleedyada.
- Is-gaarsiin wax-ku-ool ah.
- In la qiimeeyo horumarka laga sameeyay ka hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ee rabshadaha wata.
- In si joogto ah loola socdo hawlaha xoojinaayo meel-marinta Istaatiijiyada iyo qorhse hawleedkeeda.
- Ujeedada ka-hortagga iyo la dagaalanka xagjirnimada rabshadaha wadata waa in laga gaaro xal waara oo loo maraayo in khilaafaadka lagu xalliyo wada hadal. Xalalkaan waxaa ka mid ah in la dhaqan geliyo Istaraatijiyadda Qaran iyo Qorshahaheeda si loo fududeeyo ciribtirka xagjirnimada iyadoo la abaabulayo dowlad goboleedyada, hay'adaha federaalka, iyo bulshada rayidka ah, qeybaha Ganacsiga gaarka, qurba-joogta iyo Saaxibada Soomaaliya.

Waxay istaraatiijiyadan ku salaysan tahay **qodobo** muhiim ah **iyo qawaaniin aasaasi ah,** kuwaas oo naga soocaya kuwa adeegsada falalka gurracan ee annaga iyo inta kale lidka ku ah. Islaamku wuxuu sare u qaadaa xasiloonida iyo nabad ku wada noolaanshaha, wuxuuna xoojiyaa jiritaanka sida ay na farayso Diinteena.

**Waxaan si adag u cambaaraynaynaa nooc kasta oo argagixiso oo lid ku ah diinteenna ama bulshada ku abuuri kara nacayb iyo falal ammaan darro**. Waxaan kaloo si adag uga soo horjeednaa isla markaana dadaal adag ku bixinaynaa dhawrista qawaaniinta caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, xorriyadda dadweynaha, sharciga iyo kala dambaynta, annagoo qaadayna talaabo kasta oo aan kula dagaalamayno, ugana hortaggayno falalka argagixisada.

Istaraatiijiyadani waxa ay xuddun u tahay Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka. Dadaalada xoogga leh ay Dowladda Federaalka Soomaaliya kaga hor tegayso kugulana dagaal la mayso xagjirnimada rabshadaha wadato iyadoo diiradda saaraysa sidii loo horumarin lahaa Istratijiyadda ka hortagga Xagjirnimda.

Yoolasha Amniga iyo nabadgalyada oo ay sida dhabta ah u meel-marisay dowladda Soomaaliya, ayaa sidoo kale hoosta ka xariiqday muhiimadda dadaalada ka Hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ee rabshadaha wato. Yoolasha Nabadda iyo Amniga, gaar ahaan yoolka 3-aad ayay dowladdu diiradda saaraysaa geeddi-socodkiisa, kaasoo wiiqeya argagixisada iyo tabahooda, marka la waafajiyo xeerarka caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka oo mudnaan siinayo gacan siinta dowladda si loo yareeyo saamaynta xagjirku ay ku leeyihiin bulshada Soomaaliyeed."[1]

## DULMARKA ISTARAATIIJIYADA

Bulsho walba oo meel ku dhaqan, waxay u baahan yihiin hab-dhaqan sharci oo kala dambayn ku dhisan, si loo wajaho fikirka xagjirka. sida baaritaannada, dacwad oogista, garsoorka iyo nidaamka maxaabiista. Hase yeeshee, Waxaa si cad loo dareemi karaa koror ka xad-dhaafka ah ee jira awgeed in aan lagu xakamayn Karin noocyadaan oo keliya, marka la eego dabeecadda fikirka xagjirka ee rabshadaha wata. Sidaas darteed, waxaan dowlad ahaan ku tiirsannahay hab-raacyada dhaqanka iyo xeer-hoosaadyada ku dhisan ee go'doominta dhacdooyinkaas, waxayna u arkaan wax-ku-ool, kuwaasoo ay ku dhaqmaan bulshooyinka la xaqiro oo inta badan dareensan in xuquuqdooda lagu tunto. Sida ku cad qaabka hawlgalka ee **modus operandi** (MO) ee Fikirka xagjirka ee Rabshadaha Wata ee ay u adeegsadaan xasilooni-darrida iyo kicinta welwelka fikirka rabshadaha wata ee xagjirka, si ay xiisado u abuuraan, iyagoo uga dan leh inay sare u qaadaan taageerada ay bulshada ka helayaan.

[1]Dagaalka Soomaalia 2013, Dawladda FederaalkaSomalia, Page 7. Booqo:, http://eeas.europa.eu/delegations/somalia/documents/press_corner/20130916_the_somali_compact.pdf.

**Waxaan si adag u cambaaraynaynaa nooc kasta oo argagixiso oo lid ku ah diinteenna ama bulshada ku abuuri kara nacayb iyo falal ammaan darro**. Waxaan kaloo si adag uga soo horjeednaa isla markaana dadaal adag ku bixinaynaa dhawrista qawaaniinta caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, xorriyadda dadweynaha, sharciga iyo kala dambaynta, annagoo qaadayna talaabo kasta oo aan kula dagaalamayno, ugana hortaggayno falalka argagixisada.

Istaraatiijiyadani waxa ay xuddun u tahay Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka. Dadaalada xoogga leh ay Dowladda Federaalka Soomaaliya kaga hor tegayso kugulana dagaal la mayso xagjirnimada rabshadaha wadato iyadoo diiradda saaraysa sidii loo horumarin lahaa Istratijiyadda ka hortagga Xagjirnimda.

Yoolasha Amniga iyo nabadgalyada oo ay sida dhabta ah u meel-marisay dowladda Soomaaliya, ayaa sidoo kale hoosta ka xariiqday muhiimadda dadaalada ka Hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ee rabshadaha wato. Yoolasha Nabadda iyo Amniga, gaar ahaan yoolka 3-aad ayay dowladdu diiradda saaraysaa geeddi-socodkiisa, kaasoo wiiqeya argagixisada iyo tabahooda, marka la waafajiyo xeerarka caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka oo mudnaan siinayo gacan siinta dowladda si loo yareeyo saamaynta xagjirku ay ku leeyihiin bulshada Soomaaliyeed.”[1]

## DULMARKA ISTARAATIIJIYADA

Bulsho walba oo meel ku dhaqan, waxay u baahan yihiin hab-dhaqan sharci oo kala dambayn ku dhisan, si loo wajaho fikirka xagjirka. sida baaritaannada, dacwad oogista, garsoorka iyo nidaamka maxaabiista. Hase yeeshee, Waxaa si cad loo dareemi karaa koror ka xad-dhaafka ah ee jira awgeed in aan lagu xakamayn Karin noocyadaan oo keliya, marka la eego dabeecadda fikirka xagjirka ee rabshadaha wata. Sidaas darteed, waxaan dowlad ahaan ku tiirsannahay hab-raacyada dhaqanka iyo xeer-hoosaadyada ku dhisan ee go’doominta dhacdooyinkaas, waxayna u arkaan wax-ku-ool, kuwaasoo ay ku dhaqmaan bulshooyinka la xaqiro oo inta badan dareensan in xuquuqdooda lagu tunto. Sida ku cad qaabka hawlgalka ee **modus operandi** (MO) ee Fikirka xagjirka ee Rabshadaha Wata ee ay u adeegsadaan xasilooni-darrida iyo kicinta welwelka fikirka rabshadaha wata ee xagjirka, si ay xiisado u abuuraan, iyagoo uga dan leh inay sare u qaadaan taageerada ay bulshada ka helayaan.

---

[1]Dagaalka Soomaalia 2013, Dawladda FederaalkaSomalia, Page 7. Booqo:, http://eeas.europa.eu/delegations/somalia/documents/press_corner/20130916_the_somali_compact.pdf.

Haddaba, waxaa fikirkan laga dheehan karaa in ka hortagga iyo la dagaallanka fikirka xagjirka ee rabshadaha wata uu u baahan yahay talaabooyin Istaraatiijiyadeed oo si dhab ah ay dowladdu awood ugu heli lahayd dagaalka ka dhanka ah xagjirka, caqabadaha Qaab-dhismeedka, xallinta carada iyo tabashooyinka (ay ka mid yihiin. saboolnimada, gacan ku haynta deegaannada/xudduudaha, aqoon la'aanta iyo Shaqo la'aanta), sidoo kale, fikradaha abuura xag-jirnimada rabshadaha wata iyo abaabulka shaqsiyaadka ama kooxaha si ay u fuliyaan rabshado. Tani waxay u baahan tahay faham dheeraad ah ee ku aadan Fikirka xagjirka ee Rabshadaha Wata iyo qaabka aay ku soo xera galiyaan shakhsiyaadka, qoyska iyo xidhiidhka daahsoon ee beelaha dhexdooda ka jira sidoo kale, qiyaasta siyaasadeed ee is-bahaysiga beelaha kala duwan sida. qabaai'lka.

Istaraatiijiyadani, waxay tilmaameeysaa qaabkii loo taageeri lahaa bulshooyinka loo bartilmaameeystay in laga dhaadhiciyo fikir xagjir ah: iyadoo loo qeybinayo qalab ama agab la siinayo qoyska, saaxiibada, iyo hoggaamiyaasha bulshada ee lagu kalsoonyahay, si aay ula falgalaan heer shakhsi. in hawlo lala wadaago ururada bulshada rayidka ah, si sare loogu qaado awoodaynta bulshada, iyadoo laga qeybgalinayo waxqabadka heer deegaan, horumarinta xirfadaha, dhexdhexaadinta iyo xallinta khilaafyada. la shaqeynta ururrada bulshada rayidka ah ee heer deegaan, si loogu fududeeyo qaab sahlaya wada-xaajood dowladda iyo beelaha, si loo xalliyo tabashooyinka iyo carada jirta.

Waxaan ku soo gebegebeynaynaa, inuu dukumentigan oo uu wehliyo Qorshe-hawleedka uu ku wejehan yahay ficil ahaan isku-xirnaan wacan oo lagu meel-marinayo hawlgallo baaxad leh iyo mudnaan-siinta qeexan oo inoo horseedi doonta inaynu si dhab ah ugu guulaysan doono dadaallada wadajira ee ka hortagga iyo la-dagaallanka fikirka xagjirnimada Soomaaliya.

## XARUNTA QARAN EE TUBSAN

Xarunta Qaran ee ka Hortagga iyo la Dagaalanka fikirka xagjirka ah ee rabshadaha wata ee Tubsan waa xarun ka kooban Hay'ado dowladeed oo isugu jira heer Federaal iyo heer Dowlad gobaleed. Xarunta waxaa lagu dhisay xeer Golle Wasiiro ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sida ku cad xeer number 131 ee uu saxiixay Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka Soomaaliya Bishii Juun 2023.

Xarunta Qaran ee Tubsan waxaa ay hoos tagtaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya. Xaruntu waxa ay xiriirisaa isla markaana la shaqeysaa hay'ado dowli ah iyo kuwa aan dowli ahayn si loo hubiyo in si isu dheelitiran loo dhaqan geliyo Istiraatiijiyadda Qaran ee ka Hortagga iyo La Dagaallanka Fikirka Xagjirka ah ee Rabshadaha Wata.

## HIIGSI

Dhisidda awood wadareed xoggan oo dhammaan heerarka bulshada ah si ay u diidaan ugana hortaggaan aragtiyaha xagjirka ah ee rabshadaha wata ee sababa argagixisada, si loo hubiyo loona gaaro Soomaaliya oo nabad ah, barwaaqo ah, oo aysan ka jirin kooxo leh afkaarta xagjirka ah ee rabshadaha wadata.

## HIMILO

In la isu keeno dhammaan dhinacyada dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayn si ay u xoojiyaan wada shaqeynta iyo xiriirka iskaashi si loo gaaro dadaalka qaran ee ilaalinta shacabka ayadoo la fulinaya habka "Dowlad mida" iyo "Bulsho mid ah", iyo dhismaha u adkeysiga xagjirnimada rabshadaha wadata si loo gaaro yoolka Istiraatiijiyadda qaran ee ka hortagga xagjirnimada rabshada wadata.

## KAALINTA XARUNTA QARAN EE TUBSAN

Xaruntu waxa ay u xil saaran tahay in ay hoggaamiso isla markaana isku xirto hay'addaha kala duwan ee dadaalada kala duwan ugu jira ka hortagga iyo wiiqidda xagjirnimada rabshadaha wadata ee horseedda fikirka argagxisada leh heerarka kala duwan ee hay'adaha dowladda iyo la shaqeynta hay'adaha aan dowliga ahayn si loo hubiyo in Istiraatiijiyadda Qaran loo fuliyo hannaan isu dheeli tiran, loo dhan yahay oo dhammaystiran.

Xaruntu waxa ay mas'uul ka tahay dhisidda iyo horumarinta iskaashiga laba geesoodka ah iyo midka dhinacyada badan iyadoo horumainaysa xiriirka dowladda dhexe, dowlad goboleedyada iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeeya wiiqidda xagjirnimada rabshadaha wadata ee horseedda argagixisada.

Himilooyinka istiraatijiyadda waxaa lagu sii hawlgelin doonaa shan tiir oo muhiim ah.

## MABAADI'DA HAGAYSA ISTIRAATIIJIYADDA

Istaraatiijiyadda Qaran ee Ka Hortagga iyo La Dagaalanka Xag-jirnimada Rabshadaha Wadata ayaa dejinaysa mabaadii'da hagaysa dadaallada qaran ee looga hortaggayo laguna wiiqayo Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata:



## XAALADDA DALKA

Soomaaliya Waxay ku taallaa qeybta bari ee Afrika, waa mid ka mid ah dalalka adduunka ugu istiraatijiyadeedsan juquraafi ahaan, isku xirta Badweynta Hindiya, Badda Cas, iyo Gacanka Cadmeed.

Soomaaliya waxay ku jirtay colaad in mudda ah . Soddonkii sano ee la soo dhaafay, dalka waxaa halakeeyay colaado hubeysan oo daba dheeraaday oo ku bilowday dagaal sokeeye, wajiyo kala duwanna yeeshay, ku waasoo uu ugu dambeeyay halganka lagula jiro argagixisada mayalka adage e magaca diimeed huwan.

Dalku waxa uu weli wajahayaa khatar joogta ah oo kaga imanaysa Al-Shabaab iyo ISIS-Dacish, oo labaduba ku jira liiska argagixisada ee Golaha Ammaanka Qaramada Midoobay. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay qaaday talaabooyin ay ku fulinayso waajibaadkeeda sida ku cad go'aannada Golaha Ammaanka iyo Golaha Guud iyadoo qaadatay dowrkeeda Ka-hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ee rabashadaha wata. Bishii Nofembar 2016 oo ahayd markii istritaajiiyaddan la sameeyay.

In kastoo Dowladda Soomaaliya iyo bulshadeedu iyagoo kaashanaya saaxibada caalamiga ah ay duullaan ballaaran oo guulaystay ku qaadeen Al-Shabaab si looga saaro degaanada ay ka taliyaan ayaa hadana aan wali lagu guuleysan in dhammaan degaannada ay muddo 15 sanadood ka arriminayeen gacanta dowladda soo wada galaan, magaalooyin kaasoo ay maamulaan kana qaadaan bulshooyinkaas canshuuro.

## WELWELKA DEEGAANKA EE XILLIGAN[2]

Waxay Soomaaliya dhibaato weyn kala kulantay xal u helidda dadaallada ka dhanka ah fikirka xagjirka ee rabshadaha wata, iyada oo ay naga go'antahay inaan sii wadno dadaaladeena ka dhanka ah kooxaha ku leh fikirka rabshadaha wata geystana falalka argagaxsinimo. Waxaan ku faraxsannahay horumarka aan gaarnay sanooyinkan dambe ee ka dhanka ah Al-Shabaab, waxaana naga go'an inaan sii wadno dadaallada aan ku wiiqeyno iyaga iyo cidkasta oo kale ee ku hawlan fikirka xagjirka ee rabshadaha wata oo ay xagjirka sameeyaan. Waxaa muhiim ah in aragtida Istaraatijiyaddeennu ay tahay mid marxalad fog socon doonta, taasoo nagu dhiirrigelinaysa inaan u diyaar-garowno nolol Soomaaliya ka hirgasho, iyadoon Al-Shabaab jirin. Si kastaba ha ahaatee, waxaan kaloo la soconnaa in kooxda aysan awood lahayn oo ay taag-daran yihiin. Waxayna weli fikirka rabshadaha xagjirka ka fuliyaan dhulka miyiga iyo bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya, gaar ahaan Jubaland, Puntland iyo waqooyiga Kenya. Waxay bartil-maameedsadaan dadka aan waxba galabsan, weerrarada Hoteellada, goobaha dadweynuhu ku kulmaan, iyo bartil-maameedyada kale ee u nugul qaraxyada.

---

[2]Daraasaadkeenna Welwelka Heer Qaran ayaa tilmaamaysa Dib-u-eegis baaxad leh iyo dasaaraso dheeraad ah iimnika socda oo ku wejahnan hawlgalla da arrimaha Amniga Soomaaliya.

Halka aan doonayno inaan xasillooni ka dhalinno, nabadgaliyo iyo barwaaqo ku soo dabbaalno, oo dadaallada aan ku tirtirayno kuna burburinno Al-Shabaab ma ahan oo keliya dalkeenna, laakiin waa dhammaan gobolka Geeska Afrika. Weerraradii lagu qaaday goobtii ciyaaraha lagu daawanayey ee Uganda, dadkii ku cashaynayey Hotelkii Djibouti, dadkii ka dukaamaysanayey suuqyada iyo Ardaydii Jaamacadda ku taalay ee Kenya, Tusaale ahaan waxay muujinayeen Al-Shabaab inay awood u leeyihiin dilalka dadweynaha ee ay weerrarada argagixisada ku qaadeen oo la mid ah fikirka xagjirka ee rabshadaha wata ay u geystaan ururrada kale ee ay is-bahaystaan sida Al-Qacidah.

Waxaa kaloo jira dareen ah in Daacish (ISIS) laga yaabo inay ku faafaan gobolka kaddib markii ay muujiyeen olole bartamihii sannadkii 2015 inay Al-Shabaab qorshaynayaan inay qaarkood iskaashi la yeeshaan dhaqdhaqaaqa caalamiga ah ee Al-Qaacida. Isku daygaasi waa fashilmay (ilaa hadda) laakiin waa inaan u diyaar-garownaa sidii aan uga hortagi lahayn qaabkasta oo fikirka xagjirka ee rabshadaha wata iyo weerarro aanu uga badbaadinnayno dadweynaheenna.

Ciidammada qalabka sida, kuwa caalamiga ah iyo bulshada ee dagaalka kula jira Al-Shabaab waxay ku tallaabsadeen guulo laxaad leh, laakiin wax badan baa weli u baahan in la qabto, si aan u adkayno xawliga hawlgallada cirka ee ka dhanka ah dhaqdhaqaaqa Al-Shabaab hoggaankooda iyo goobo badan oo laga qabsaday oo ay si weyn ugu jabeen.

Waxaa barbar socday, horumar xoog leh oo dhinaca Istaraatiijiyadda Warbaahinta ama Is-gaar-siinta laga sameeyey iyadoo dadaaladaasna ay ka mid ahaayeen baaqyada la dagaallanka iyo ka hortagga fikirka xagjirka ee rabshadaha wata ee lagu dhisayey bulshada qeybeheeda oo taageero gaar ah loo sameeyey iyo dadaallo kale oo looga horjoogsanayey bulshadu inaysan ku biirin tababarrada xag-jirnimada iyo weerrarada hubaysan, taasoo ah tiirka ugu dambeeya Istaraatiijiyadda heer Qaran.

Iyana waxaa dagaalka ciidan ee lagu cirib tirayo argagixisada garab socday, dagaalka xagga fikirka diiniga ah ay horseed ka yihiin culimada Soomaaliyeed iyo sidoo kala cunaqabatay maaliyeed oo lagusoo rogay argagixisada iyo taageerayaashooda ama maalgeliyeyaasha.

## CIDDA KA DAMBAYSA FIKIRKA XAGJIRKA RABSHADAHA WATA

Cilmi-baaris sii kordheysa oo ku saabsan xagjirnimada rabshadaha leh ayaa keentay in la aqoonsado laba qeybood oo ah darawallada/Sababaha gacan ka geysan kara taageerada shaqsi ahaaneed ee ajandayaasha xagjirka ee rabshadaha wata. Qeybta hore waxaa badanaa loo yaqaan "cunsurka riix." Kuwani waa xaalado dhismeed - sida horumar-la'aan, waxbarasho la'aan ama shaqo la'aan, iyo takoorid bulsho - taas oo laftooda, ama ay u badan tahay marka lagu daro arrimo kale, waxay sii hurin karaan cabashooyinka ka dhigaya shakhsiyaadka u heellan xagjirnimada rabshadaha leh. Cabashooyinkan waxaa laga yaabaa in loo dareemayo magaca bulshooyinka ay shakhsiyaadka wadaagaan dhaqan, fikradeed, diin ama qoomiyad, xataa haddii ay ku jiraan masaafo jireed.

Qeybta labaad ee qodobbada waxa loo yaqaan "cunsurka jiid." Arrimahan waxa loo kala saaray dhiirigelin degdeg ah oo ka dhigaysa fikradaha xagjirka ah ee rabshadaha leh ama kooxaha soo jiidashada - oo ay ku jiraan soo jiidashada shakhsiyaadka, isgaadhsiinta istaraatiijiga ah ee xoogga leh iyo fariimaha qasabka ah, faa'iidooyinka maaliyadeed ama agab kale, ama heerka bulsheed ee xubnaha kooxda qaarkood ay dareemaan inay ku guulaysteen inay noqdaan qeyb ka mid ah argagixisada ama kooxda xagjirka ah.

Waxaa jira khibrad badan iyo aragti maxalli ah oo ku saabsan ifafaalahan, laakiin waxaa loo baahan yahay in tan si rasmi ah loo sameeyo oo arrimaha riixitaanka iyo soo jiidashada si nidaamsan loo kala saaro loona lafo-guro. Waxa kale oo jirta baahi weyn oo loo qabo cilmi-baadhis casri ah, daraasado goobeed, iyo falanqeyn si loo ogaado wadayaasha xagjirnimada rabshadaha leh iyo go'aan qaadashada barnaamijka. Jadwalkani wuxuu si kooban u soo koobayaa arrimaha jiidashada iyo riixida guud.

| Qodobada Sababa | Qodobada Saacida |
|---|---|
| - Katagida qeyb kamida bulshada/Qeybsanaanta bulshada<br>- Cadaadis dowladeed/Xadgudub<br>- Liidid/yasid<br>- Hanjabka Dhalinyaradda<br>- Saboolnimada, heerka nolasha liita<br>- Shaqo la'aanta dhalinyarada<br>- Cadaalad darro waqtibadan so jirtay<br>- Wahsi/ caajis<br>- Lasocodka wararka, Warbaahinta<br>- Go'aamada ay garaan qoys ama qabiil | - Deegaan ay ka jirto xagjirnimo diimeed<br>- Mayal-adayga beensheegida fasirka iyo fahamka diinta<br>- Fasiraada gurucan ee la xiriira jihaadka<br>- La'aanta hogaan Masaajido waxtar leh<br>- Urrurada Bulshada<br>- Baahida cullumo xikamad wacyi diiniya ah leh<br>- Fursado waxbarsho iyo shaqo<br>- Isku-kalsoonan / Awoodsiin qofka<br>- Heerka bulshada iyo qadirinta ay siiyaan dadka ay isku-faca yihiin<br>- Rabitanka qofku dagayo, guursanaya ama qoys yagleelo |

Waxaa muhiim ah in lasameeyo daraasad diirada lagu saarayo xagjirka rabshadaha wata iyo caqabadaha uu ku leeyahay wadankeena iyo gobolkeena.Waxa jira xogo hordhac oo aad u muuhiim u ah, tusaale, wareysiyo lala yeeshay dagaalyahanadii hore ee Alshabaab kasoo goostay laguna dhagan celiyey xarunta magaalada Baydhabo sanadkii 2016 iyo sidoo kale 88 dagaalyahan oo horey uga tirsanaa Al-Shabaab oo lagu dhaqan celiyey xarunta dhaqan celinta ee Muqdisho bishii Sebtember 2014 waxa ay caddeeyeen in sababaha ugu badan ee dadka ugu biiraan Al-Shabaab ay tahay dano dhaqaale. Wareysigii 2014-kii ayaa lagu sheegay in wiilal dhalinyaro ah lagu qanciyey in ay ku biiraan kooxdaasi ka dib markii la siiyay telefoonnada gacanta iyo in ay helayaan ballanqaad lacageed oo gaareya 50 US bishii. Waxaa kaloo la og yahay in shaqaalaysiinta tooska ah aysan ahayn wadada kaliya ee al-Shabaab ay uga faa'iideysato in ay dhaqaale kusoo jiitaan. Kooxdu waxa ay ka faa'iideysatay "marka loo eego kala qeybsanaanta kuwa ku nool magaalooyinka iyo tuulooyinka, kooxdu waxay mushaar u qoreen odayaasha dhaqanka ee ku nool dhulka Miyiga ah. Waxay sidoo kale awood u siiyaan ama hubeeyaan raga dhalinyarada ah, gaar ahaan kuwa kasoo jeeda beelaha laga tirada badan yahay, ama aan awoodda lahayn, si ay u difaacaan bulshadooda iyo qoysaskooda." Tani waa qaab caam oo ay isticmaalaan ururrada xagjirnimada rabshadaha ku dhisan ee caalamka ka jira, kooxahani waxa ay ku dadaalan inay ka faa'idaystaan xiisadaha u dhexeeya qowmiyadaha, qabaa'iladda iyo khilaafaadka Diimaha si ay ugu helaan taageero ujeedooyinkooda.

## CAQABADAHA P/CVE EE HADDA JIRA

Kadib sanado badan oo xasilooni darro ay ka jirtay Soomaaliya, weli dalka waxaa uu wajahayaa khatarta kooxaha xagjirka ah ee Al-Shabaab iyo ISIS, kuwaas oo maamula deegaano balaadhan oo ay deganyihiin bulsho badan, in kasto qeybo kamid ah Soomaaliya laga sameeyey horumar ay horseed u yihiin ciidamada qalabka sida, bulshada deegaanka, Hawlgalka, kumeel gaarka ah ee Midowga Afrika ee Soomaaliya (ATMIS) iyo Saaxiibada caalamiga ah ee kale.

Ilaa iyo maanta, xaaladaha saamaxaya ee ku dhisan fikirka gurucan ee xagjirka ayaa ah arrimo dhabta ah ee ka jira Soomaaliya taasi oo caqabad ku ah ciribtirka argagixisada. aqabadaha waxaa ka mid ah: -

- Bulshooyinka ay colaaduhu saameeyeen oo u nugul xaaladaha ka dhasha xagjirnimida.
- Firaaq ka jira amniga deegannada.
- Lama hayo Cilmi baaris ku filan iyo waxa aan jirin madal lagu wadaago cilmiga ku saabsan fikirka xagjirnimada.
- Majiraan Hanaanka isku-duwida iyo xiriirinta barnaamijyo ka hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka.
- Waxaa liita ama aan jirin hananka shuruucda, siyaasadaha iyo barnaamijyada wax looga qabanayo fikradaha xagjirka ee rabshadaha wata.
- Xirfad darada iyo la'aanta xarumo looga hortago xagjirnimada loogana hadlo khilaafaadka abuuray fogaanshaha taasi oo usuuro gelisay kooxaha xagjirka ah in ay shaqaale ahaan u qortaan dadka jilicsan ama nugul.
- Samaynta iyo hirgelinta barnaamijyada horumarinta ee ka hortagga xagjireynta oo aan si wanaagsan u socon.
- La'aanta hab dhameystiran oo lagu sameynayo dhaqancelin iyo dib-ula midoobid dagaalyahanada xagjiriinta kasoo goostay.
- Waxa aanan jirin fursadaha dhaqan-dhaqaale ee bulshada.
- Maamul xumo, ku xadgudubka ka dhanka ah xuquuqda Aadanaha iyo sarrayn sharciga.

Istaraatijiyaddan wax ay ka qeyb qaadan doontaa xal u helidda caqabadaha halista ah ee kor ku xusan waxayna gacan ka geysan doontaa in la meel mariyo xal waara oo loogu talagalay ka hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ah.

## KARTIDA IYO WAXA AN AWOODNO

Dowlada Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka, hay'adahooda, Ciidanka Xoogga Dalka, Booliska, Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (NISA), iyo hawlwadeenada Xarunta Qara nee Tubsan ee Ka Hortagga iyo La Dagaalanka Fikirka Xagjirka iyo saaxiibada beesha caalamka waxa dowrweyn ka qaateen la dagaalanka iyo ka fal-celinta fikirka iyo ficilada xagjiriinta.

Xarunta Qaran ee Tubsan waxa ay isku dubarid iyo korjoogtayn ku samaynaysaa dadaallada looga hortaggayo fikaradaha xagjirnimada rabshadaha wata iyadoo la hawgalayso hay'ada badan iyo saamiley kala duwan si loo fulinayo Istaratijiyada Qaran iyo Qorshe Hawleedka KA HORTAGGA IYO LA DAGAALANKA FIKIRKA XAGJIRKA EE RABASHADAHA WATA. Hawlaha xudunta waxaa kamida kuwan soo socda:

- Isku-dubaridka dadaalada hay'adaha amniga ee hawlaha P/CVE.
- Isku-dubaridka hawlaha iyo kartida dhammaan daneeyayaasha arrimaha P/CVE
- Isku-dubbaridka barnaamijyada iyo hawlaha P/CVE iyada oo la hubinayo in dadaallada qaran ay noqdaan kuwo isku dhafan oo waxtar leh.
- Dejinta istiraatiijiyad iyo Qorsheyaal hortabinta / mudnaanta leh ee heer Federaal iyo heer dowlad goboleed.
- Qiimeynta iyo dib-u-eegista istiraatijiyadda iyo qorshaheeda fulinta.
- Shuruucda, siyaasadaha, iyo qorsheyaasha lagu maamulayo barnaamijyada ka hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ee rabshadha wata.
- In wax lagu kordhiyo dadaalada caalamiga ah ee looga soo horjeeda arrimaha
- Xagjirnimada.

## GUUD MARKA ISTIRAATIJIADDA QARAN EE KA HORTAGGA IYO LA DAGAALANKA FIKIRKA XAGJIRKA EE RABASHADAHA WATA.

Istaraatijiyadan waxa ay kusaleysantahay mabaadii'da iyo qiyamka wanaagsan ee kala soocaya kuwa adeegsada rabshadaha ka dhanka ah dadka kale iyo kuwa ay saameynta ka soo gaarto. Islaamku wuxuu dhiirigeliyaa kuwada noolaanshaha nabadda oo ku salaysan caqiidadeena suuban. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ay si xooggan u canbaareyneysaa qaab kasta oo xadgudub ku ah diinta islaamka oo loo suuro xumeeyo tafsiirkeeda si loogu adeegsado faafinta nacaybka rabshadaha wata. Sidoo kale, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ka go'an in la fuliyo la

```
ERROR: rangecheck
OFFENDING COMMAND: curveto

STACK:

0.000976562
0.380859
-0.000488281
0.383789
-0.00146484
0.387939
-savelevel-
```